




Khariidad. *Jidkii tahriibka ee Maxamed Xuseen Geeldoon*

Waxa daabacay Machadka Dooxada Rift sannadkii 2016
26 St Luke's Mews, London W11 1DF, United Kingdom
PO Box 52771, GPO 00100 Nairobi, Kenya

MACHADKA DOOXADA RIFT (RVI)
Machadka Dooxada Rift (www.riftvalley.net) waxa uu ka hawlgalaa Bariga iyo Bartamaha Afrika si aqoonta maxalliga ah looga faa'iideeyo arrimaha bulshada, siyaasadda, iyo horumarka dhaqaalaha

MADASHA DOOXADA RIFT (RIFT VALLEY FORUM)
Madasha Dooxada Rift waa madal lagu falanqeeyo doodaha muhiimka ah ee siyaasadda, dhaqaalaha, iyo arimaha bulshada ee Geeska Afrika, Bariga iyo Bartamaha Afrika, Suudaan iyo Suudaanta Koonfureed.

QORAAGA
Maxamed Xuseen Geeldoon waxa uu ku dhashay Ceerigaabo sannadkii 1987. Isaga oo da' yar waxa uu muddo sannaddo ah isku dayayay in uu u tahriibo Yurub. Hase ahaatee kadib dhawr iskuday oo uu ku guul darraystay waxa uu kusoo guryo-hoyday Somaliland halkaas oo u ka dhigto jaamacad kana waaniyo da'yarta tahriibka.



WAXA SUURTO GALIYAY
AGAASIMAHA FULINTA EE RVI: John Ryle
AGAASIMAHA GEESKA IYO BARIGA AFRIKA EE RVI: Mark Bradbury
MAAMULAHA XOGTA IYO BARAAMIJYADA EE RVI: Tymon Kiepe
ISKUDUWAHA DARAASADDA "SAAMAYNTA DAGAALADU KU YEESHEEN RAGGA": Judith Gardner
WAXA WARAYSTAY: Saciid Maxamed Daahir
WAXA TARJAMAY: Omar Ali Abdillahi
TIFAFTIRKA: Kate McGuinness
NAQSHADDA: Lindsay Nash
KHARIIDADAHA: Jillian Luff, *MAPgrafix*
ISBN 978-1-907431-42-5
MUUQAALKA KORE: 'Tahriib' – Doonidii geerida oo uu sawiray Nagiib Carab Ibraahim 'Farshaxanka Hanad'. Waxa ku deeqday Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa

XUQUUQO
Xuquuqda Daabacaadda © Machadka Dooxada Rift 2016
Sawirka Jaldiga Buugga © Nagib Carab Ibrahim 2013
Qoraalka iyo khariiradda waxa la soo daabacay iyada oo la adeegsanyo liisanka Creative Commons
Attribution-NonCommercial-NoDerivatives 4.0 International
www.creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/4.0
Waxa si bilaash ah looga soo dajin karaa www.riftvalley.net
Nuqullo daabacanna waxa laga heli karaa barta Amazon iyo baraha kale internet ka oo ku iibinaya tafaariiq.

Tusmada

Araar	11
Lakulankii Geeldoon	19
Qaybta Koowaad: Bilawgii hore ee nolosha	23
Qaybta Labaad: Tahriibkii	49
Qaybta Saddexaad: Dhammaadkii tahriibka	121
Ururinta Tixraaca	141
Khariidad. Jidkii tahriibka ee Maxamed Xuseen Geeldoon	3

Hibayn: Saciid Maxamed Daahir

Araar

Sheekadani waa waraysigii ugu horreeyay ee ku saabsan waayo aragnimadii wiil dhallinyaro ah oo reer Somaliland oo taahriibay. Tahriib, waa eray af-carbeed ah oo macnihiisu u taaganyahay hab cusub oo soo badanaya oo socdaal aan sharci ahayn ah oo ay galaan tiro badan oo dhallinyaro Soomaali ah oo rag iyo dumarba leh oo u socdaalaya Yurub iyaga oo sii dhex maraya Itoobiya, Suudaan, iyo Liibiya kamadanbaytana ka tallaabaya badda Midhatareninaynka.

Dadka Soomaalidu waxa ay leeyihiin taariikh dheer oo dhanka socdaalka ah. Barigii hore in la socdaalaa waxa ay ahayd tab lagula soo baxo nolol maalmeedka reerka. Socdaalku waxa uu ka mid yahay hababka ragga Soomaaliyeed oo leh sooyaal reer-guuraanim ay kaga taageeraan qoyskoodu in ay ku samatobaxaan xilliyada ay jiraan dhibaatooyinku sida abaaraha oo kale. Ilaa dhammaadkii 1980-kii, boqolaal kun ayaa ka cararay dagaal iyo abaaro ka dhacay gayiga Soomaalida. Iyada oo xasaraduhu hoos u dhaceen ayaa tiro badan oo Soomaali ahi, gaar ahaan ragga dhallinta ahi, sii wadaan in ay ka baxaan dalka iyaga oo raacdo ugu jira nolol wanaagsan oo ay ka helaan qurbaha.

Tan iyo markii uu dagaalka sokeeye ka bilawday dalka Liibiya sannaddii 2011 iyo amnidarradii xigtay, tirada dadka maganglayo-doonka ah iyo dadka sida sharcidarrada ah u socdaalaya oo dhexmaraya Liibiya ama raba in ay ka tallaabaan badda Medhiteraaniyanka, si aad ah ayay u korodhay. In badan oo dadkan ka mid ahina waxa ay ahay Liibiya u arkaan irridka laga galayo Yurub.[1] Bishii Juun ee

1 Franziska Brantner and Mattia Toaldo, 'The Libyan context of the migration crisis', European Council on Foreign Relations, 22 May 2015.

2013, jaaraa'idka ka soo baxa Somaliland waxa uu ku qiyaasay in ay bil walba dad tiradoodu tahay 150 qof ka tagayeen Somaliland una socdaalayeen Liibiya.[2] Muddadan waxii ka danbeeyay waxa si aad ah kor ugu kacay tirada dadka ee ka gudbaya badda Medhiteraaniyanka. Sannaddii 2015 dad tahriibayaal ah oo lagu qiyaasay 154,000 ayaa marinkan ka soo galay qaaradda Yurub tiradan oo kun- jeer- laab ku ah tiradii 2012. Dadkan intooda badani waxa ay ka yimaaddeen Geeska Afrika.[3] Haya'dda Socdaalka Caalamiga ah ee (IOM) waxa ay ku qiyaastay in sannadkii 2015 ay jireen 2,860 dhimasho oo ka dhacay marin badeedkan bilihii u dhaxeeyay Jeenawari iyo Oktoobar.[4] Dad Soomaali ah oo u badan dhallinyaro, ayaa ka mid ahaa shanta qoomiyadood ee ugu badan ee ka gudbay badda Medhiteraaniyanka lixdii bilood ee hore ee sannadkii 2015.[5] Inkasta oo wax laga qoray korodhka ku yimid socdaalka lagu tago Yurub iya sidoo kale dhimashada tahriibayaasha ee ay badda ku dhintaan, haddana waxyar ayaa laga qoray safarka tahriibka ee ka horreeya isku-dayga ka gudbidda badda Medhitereeniyanka.

Inkasta oo waxbadan laga qoray kor u kaca ku yimidday socdaalka Yurub lagu tegayo iyo dhimashada dadkani ee badda ka dhacda, wax yar ayaa laga qoraa socdaalka ay galaan ka hor inta aanay ka tallaabin badda. Taariikh nololeedka Maxamed Xuseen Geeldoon waxa la ururshay intii uu socday barnaamij cilmi-baadhis ah oo la sameeyay intii u dhaxaysay 2013 iyo 2014 oo ay fulisay hayadda RVI oo ku saabsanaa saamaynta dagaaladu ku yeesheen ragga iyo dhallinta Soomaalida. Tanina waxa ay qayb ka ahayd 44

2 'Somaliland: Madaxwaynaha oo magacaabay guddi ka tala bixisa socdaalka sharci-darrada ah iyo shaqo-la'aanta', *Somaliland Sun,* 25 June 2013, accessed 24 October 2015.

3 Sahan, 'Human Trafficking and Smuggling on the Horn of Africa–Central Mediterranean Route', IGAD: Addis Ababa, February 2016: 5.

4 Sahan, 'Human Trafficking and Smuggling', 13.

5 UNHCR, 'The Sea Route to Europe: The Mediterranean Passage in the Age of Refugees', UNHCR: The UN Refugee Agency, July 2015.

taariikh–nololeed oo ay leeyihiin rag la waraystay oo ku filiqsan degaanada Soomaalida.[6]

Waraysiga sheekadani ku salaysantahay waxa lagu qaaday Somaliland 8dii Jeenawari 2014. Waraysiga markii hore waxa lagu qoray af-Soomaali haddana waxa lagu tarjamay af-Ingiriisi. Sheekadani waa daabacad lasoo gaabshay oo la dhalanrogay oo ah sheekadii hore ogalaanshana looga helay qofka sheekadu ku saabsantahay. Sheekada waxa laga saaray dhammaan tixraacyada marka laga reebo magacyada meelaha. Magacyada meelaha waxa loo daayay si loo dareemo baaxadda socdaalka. Ujeedada sheekadu waa in la fahmo tahriibka, faham wanaagsan loo yeesho sababaha dadku u socdaalaan iyo dhibaatooyinka ay la kulmaan inta ay jidka ku jiraan.[7]

Qofka sheekadan ka sheekeeyay waxa uu markii u horraysay bilaabay socdaalkiisa 1989, kama danbayntina waxa u soo guryo-noqday laba sano kadib. Maadaama socdaalkani ahaa mid silic badan, oo muddana ka soo wareegtay, xogta ku jirta sheekada qaybo ka mid ah mugdi ayaa ku jira.

Hayeeshee waayo aragnimada Geeldoon waxa ay iftiiminaysaa waxa daraasaddu ka maqashay rag da' walba leh oo ku saabsan saamaynta dagaalka oo ay ka mid tahay tiro barakac xoog ah, waayidda heerkii bulsho iyo dhaqaale, amni darrro iyo xasuuq jinsi ku salaysan, korriin abbahii oo maqan iyo xilliyo ay jirto niyadjab. Sheekada Geeldoon waxa ay inna siinaysaa qisada kaliya ee la hayo ee ugu faahfaahsan ee ku saabsan tabriibka iyo duruufaha cadawtinimo ee ku gadaaman tahriibinta dadka.

Geeldoon nolosha ayaa ku sintay in uu ka sheekeeyo qisadiisa tahriibka. In badani waxa ay ku dhintaan isku dayga ay ugu jiraan

6 Warbixinta Daraasadda Gogolxaadhka ah ee, 'The Impact of War on Somali Men', waxa laga heli karaa warbixintan barta intarnatka ee LOGiCA (http://www.logica-wb.org/PDFs/LOGICA_The_Impact_of_War_on_Somali_Men.pdf).

7 Qoraalada ku jira qawska waa kuwo ay ay sheekada ku dareen tifaftiyaraashu. Cinwaanada waawayn iyo kuwan yararna waxa sheekada u sameeyay Tifaftirayaasha.

in ay tu tagaan waddammada Reer Galbeedka, sida uu sheegay. Sidii uu badqab ugu soo noqday Somaliland, qorshayaashiisa ugu horreeya waxa ka mid ahaa in uu sameeyo urur maxalli ah oo dhallinyarta ka waaniya khatarta tahriibka kuna dhiirri galiya in ay mustaqbalkooda ku dhistaan dhulkooda hooyo halkii ay ka tahriibi layaaheen.

Lakulankii Geeldoon

Waxa qoray: Saciid Maxamed Daahir

Markii u horraysay waxa aan Geeldoon kula kulmay tababar aan u qabtay dhaliyaro ku nool magaalada Ceerigaabo. Waxa uu ka mid ahaa tabobartayaasha si koobanna waxa uu iiga sheekayay waayo-aragnimadiisa. Sannadku waxa uu ahaa 2012. Haddana waxa aan mar kale la kulmay bishii Jaanaweri 2014 mar aan Ceerigaabo u tagay cilmibaadhis kusaabsan saamaynta dagaalladu ku yeesheen ragga. Aniga oo og in uu galay socdaal dheer, waan raacdo tagay. Waa annu wada fadhiisannay waxa aanan waydiistay in uu iiga sheekeeyo sooyaalkiisa iyo sheekada tahriibkiisii. Waan xasuustaa, waxa uu sheekaynayay isaga oo faraxsan arrintaasi oo keentay in aan su'aale dhawr ah kaliya waydiiyo. Uma aan baahan in aan waydiiyo su'aalo badan. Sheekadu si aan kala go'lahayn ayay u socotay.

Waxay ahayd sheeko aad ii soo jiidatay. Dhammaantay waxa aan dhexgalay sheekadii iyada oo aad mooddo in aan si dhab ah u fiirsanayo muuqallada dhabta ah ee uu sharraxayo. Waan xasuustaa oo hadalkiisu wuu is haystay raaxana badnaa bilawgii inkasta oo markii uu hore u socday ay shucuurtiisu is baddashay.

Xilligan Ceerigaabo aad ayay u qaboobayd. Sidaa awgeed, waxa aan ku qasbanayn in aan maalinwalba dhexda ku jarro waraysiga maadaama oo aannaan hal meel muddo dheer fadhiyi karayn. Isaga qabaw uma ahayn, aniga se way igu adkayd maxaa yeelay waxa aan ka imid dalka qaybtiisa diirran. Waqti isku mid ah ayaan la kulmay muddo saddex cisho ah. Maalin walba waxa uu i xasuusin jiray halkii uu maalinta hore sheekada ku joojay. Xasuustiisu aad ayay u fiicnayd. Arrintani waxa ay iga taageertay in aan ku sii kalsoonaado

oo aan aad u rumaytso sheekadiisa. Intii aan dhagaysanayay, waxa aan dareemay in aan qabanayo sheeko wax la mid ahi aanay jirin.

Aad ayaan ugu raaxaystay dhagaysigiisa oo ma aan rabin in sheekadu dhammaato. Markii sheekadii dhammaatay, waxa ay ila ahayd sidii qof caalam kale booqday. Laakin wali waxa aan joognay Ceerigaabo. Waxa uu ku faraxsanaa in uu dalka ku soo noqday. Rajo ayuu qabay waxa aanu ku hanwaynaa in markan uu ku noolaado dalkiisa hooyo. Isla markiiba waxa uu Ceerigaabo ka furtay meherad.

Sheekadani waxa ay ahayd mid ka mid ah sheekooyinka ugu saamaynta iyo raadka way ee aan maqaly intii aan darasadda ku jiray.

Siciid Maxamed Daahir waxa uu ku dhashay Hargaysa. Iyada oo uu kala midyahay in badan oo faciisa ah, carruurnimadiisa waxa ku suntan dagaalo sokeeye oo reerkooda ku qasbay in ay u barakacaan Itoobiya sannadkii 1988. Dagaalkii ka dib, Saciid waxa u suuro gashay in uu sii amboqaado waxbarashadiisii aanu noqdo mid kamid ah qalijabiyaayishii Jaamacaddii wakhtiyadaa la aasaasay ee Cammuud, halkaas oo uu sidoo kale wax ka dhigay. Ka hor intii aanu ku soo biirin RVI, Saciid waxa uu cilmibaadhe aahaan kula shaqeeyay urruro iyo aqoonyahanno caalami ah. Khibraddan ayaa keentay in sannaddii 2013 uu ka biiro RVI isaga oo cilmibaadho sare ka noqday diraasaad ku saabsan saamaynta dagaaladu ku yeesheen ragga soomaalida oo ah halka ay sheekadani ka soo ifbaxday. Ka dib markii uu hogaamiyay koox cilmibaadhayaal Soomaali ah oo ka hawlgalaysay diraasad ku saabsan dhulka oo RVI ka wadday Somaliland, Saciid waxa loo magacaabay Maareeyaha Diraasadaha ee Deegaanada Soomaalida bishii Jeenawari 2016. Saciid Maxamed Dahir waxa uu (AHN) si lama filaan ah u geeriyooday 5tii Maarso 2016. Si isku mid ah waxa u tabi doona qaraabadii, saaxiibadii iyo dadkii ay wada shaqaynayeen.

QAYBTA KOOWAAD
Bilawgii Hore ee Nolosha

Magacaygu waa Maxamed Xuseen Geeldoon. Waxa aan ahay inan dhallinyaro ah oo reer Ceerigaabo ah. Waxa aan ku dhashay magaalada Ceerigaabo sannadkii 1987. Waxa aan tagnay Muqdisho sannadii 1989. Muddo yar ka dib, waxa dalka ka bilaabmay rabshadihii lagaga soo horjeeday dawladdii Maxamed Siyaad Barre oo ay waqtigaa dad badan ku kacsanaayeen. Arrintani waxa ay nagu yeelatay, gaar ahaan qoyskayaga, saamayn aad u badan, waayo waxa jiray qoyskayaga qayb ka mid ah oo dawladda taabacsanayd ama u shaqaynaysay.

Runtii markii ay dawladdaasi burburtay oo ay meesha ka baxday, waxa la soo weeraray lana dhibay nimankii aan isku qoyska ahayn ee gurigayaga joogay. Markii weerarkaa nalagu soo qaaday, waan xusuustaa, guri ayaan deganayn leh dayr weyn. Ciidamo hubaysan oo jabhad ah ayaa guriyaga soo weeraray kadib markii dawladdu baxday dabadeedna xabad ku harqiyay.

Inamadii markaa joogay oo ka bixi waayay magaalada ayaa difaac galay. Wiil aannu ilmaabti ahayn ayaa meesha lagu dilay. Ka dib waxa bilaabantay in aanu ka qaxno magaalada Muqdisho oo aanu u firxanno dhanka dalka Kiiniya.

Gaadhi weyn oo xamuul ah ayaa nala saaray. Waxa aannu ahayn labadayada yar yar, gabadh walaashay ah oo naga wayn, wiil aannu ilmaadeer nahay iyo aniga.

Markii gaadhiga la i saaray raashin ayaa dusha la iga saaray inta la i illaaway illayn ilmo yar baan ahaaye. Raashinkii ayaa dusha lagaga sii fadhiistay. Nasiib wanaag, Islaantii hooyaday ahayd ayaa i aragtay

aniga oo meel in yar madaxa uun i muuqdo, markaasay qayliday "Waar, ilmaha meesha iiga soo saara". Dabadeedna waa la iga soo saaray.

Dhabtii, qax iyo dhib ayaa noo bilaabmay. Guri buuxa oo cammiran oo wax waliba yaalaan iyo nolol qabow oo amni oo wax walba leh ayaanu ku noolayn. Maalmo ka dib noloshii waxa ay isku baddashay nolol rafaad, dayac iyo waa la dilayaa hebel ama hebelba la dilay, adigana waa lagu dilayaa iyo in isbaarooyin jidka naloo dhigtay nalagu waydiiyo qabiilkayaga. Waxay gaadhay in qabiilada qaar in la xasuuqo oo hortayada lagu gumaado, gaar ahaan ragga. Dumarka waxa laga yaabaa in la daynayay oo la lahaa waa dumar oo hadday soo kacaan hadhaw cidna waxba ma yeelayaan laakiin ragga aad loo raadinayay loona laynayay.

Waxa aannu u gudubnay markaa magaalada Kismaayo oo aannu maalmo joognay. Maalmihii aanu joognay, ayaa uu haddana Kismaayo dagaalkii xoog uga sii bilaabmay. Guryo nagu xigay ayay madaafiici qabsatay oo qoysas aanu jaaar ahayn guryihii ku dumeen, qaar badana halkii ku baaba'een. Ka dib, waanu ka sii qaxnay, waxa aannu u sii qaxnay xuduuudda Kiiniya anaga oo tagnay meel la yidhaahdo Hoosingow.

Hoosingow waxa ku noolaa qoysas aanu qaraabo nahay, oo ah dadkii ka soo qaxay dalka Soomaaliya waagii Sayid Maxamed Cabdille Xasan. Qoysaskaas ayaa na soo dhaweeyay anaga oo rafaadsan, na gacan qabtay, hoyna na siiyay.

Muddo ayaan Hoosingaw joognay. Waxa aan xasuustaa ilmo yar baan ahaa, waliba dadka xasoostoodu aadka u badan tahay ayaan waqtigaa ahaa. Oday aayaa tukaan haystay laga adeegan jiray. Odaygaa ayaan u tagi jiray, markaasu igu odhan jiray,'Ina ayaad tahay?' Markaas ayaan ina ayadayda u akhrin jiray bilaw ilaa dhammaad. Wuu iga yaabi jiray markaan ina ayadayda sheego. Dabadeedna, wiilasha kale ayuu ku odhan jiray "adna ina ayaad tahay?". Markaasi ayay ina hebel hebel dhaafin waayan. Kadibna lacag buu i siin jiray.

Ka dib aniga oo halkii jooga oo lacag ku qaata ina ayadayda aan sheegayo, ayaa maalin maalmaha ka mid ah magaalada waxa soo weeraray ciidan. Ciidankaasi dad badan ayay laayeen dad kale oo badanna way qafaasheen. Ka dib anoo meeshaa jooga,ayaa ninkii ciidanka watay gacanta iqabtay oo uu yidhi "Tolow, ilmaha yar ee meesha maraya armuu nagu soo kacaa barrito, armuu reer hebel yahay, tolow ma dilaa?". Dabadeed waxa uu yidhi "waryaa ina ayaad tahay? Markaas ayaan ina ayadayda u sheegay. Markaas ayuu yidhi "dhammaystir, akhri waad garanaysaaye".'Markaas ayaan ku idhi "ina ayadayda kuu sheegi maayowaayo haddaan kuu sheego waad i dilaysaa". Dabadeed waxa uu yidhi, "waa nin caqli badan". Markaas ayuu yidhi "wallaanan ku dilayne adeer ii sheeg". Markaas ayaan ina ayadaydii u akhriyay. Ninkii waxa uu noqday mid aanu isku reer nahay. Ka dib wuxu yidhi, "ninkani waa nin wanaagsan oo isku reer baan nahay.' Waanu isoo kaxeeyay.

Runtii, meesha waxa ka socday waxa uu ahaa in mid aan ku garanayn iyo mid ku garanaya labadaba, dadku ay ahaayeen jabhado qabiil isku dilaya oo shacabkiina xasuuqaya.

Ka dib ninkii gurigayagii ayaa uu yimid. Hooyaday ayaa soo oroday oo tiri "Waar, kii yaraa maanta waxa uu noo soo kaxeeyay cadaw oo qabiilkiisiina u sheeg, oo hadda nala laynayaa". Kuwii kale iyo carruurtii ayay qarisay, debeday u soo baxday, markaas ayay tiri "wiilkan yar wuu been badan yahay".' Waxay is leedahay yaanu ninku rumaysan wuxuu u soo sheegay. Markaas ayuu ninkii ugu jawaabay "Eeddo, sidaad moodday ma aha, ninka kan isku reer baan noqonnee shaydaanka iska naar".' Ka dib nimankii waxay is yidhaahdeen siiya xoolo iyo waxay siteen oo ay soo dhaceen.

Hooyo oo ahayd qof diinta aad u jecel baa tiri "carruurtayda xaaraan siinmaaayo waxa kan carruurtayda ii dhaafiya."

Waxa dhacday in uu ninkii yidhaahdo meesha tan waan idinka kaxaynayaa oo waxa aan idiin gudbinaya Kiiniya, meesha tan ciidamo ayaa soo galay oo waa la isku dilayaa. Ka dib hooyo waa ay

diidday, waxayna tiri "nin ummad Soomaali ah gumaadaya, waxba iskuma nihine hore ii dhaaf".

Maalmo ka dib baa haddana magaaladii Hoosingow la soo weeraray oo dagaal ka bilaabmay. Waxa aan markaa u sii qaxnay xadka Kiiniya. Libooye Kiiniya intii aannaan galin, waxa dhacday in jidka ay naga helaan niman ciidamo ah oo dadka laynaya. Dadka si kala soocasho ah ayay u dilayeen. Waxa ay beegsanayeen ragga iyo inamada yaryar ee ka soo jeeda beelaha qaar si ay u dabar jaraan. Ka dib waxa naloo xidhay jilbaabo yar yar iyo toobab si naloo dhaafiyo cadawga.

Ka dib muddo yar oo aanu joognay Libooye, waxaanu u sii gudubnay caasimadda dalka Kiiniya ee Nayroobi 1992. Halkaas waxa nagu soo dhaweeyay qolyo aannu qaraabo nahay. Runtii halkaasaan nolol caadi ah oo dagan oo amni ay nooga bilaabantay. Waxa aan bilawnay sidii aan u dhiganlahayn Qur'aanka una bilaabi lahayn noloshii qoyska.

Muddadaa, marwalba iyo meelkasta oo aan joogno aabahayo nalama socon. Waxa uu ku maqnaa Imaaraadka oo uu ka shaqayn jiray. Hayeeshee, waxa uu noo soo diri jiray biil. Ka dib aabbe ayaa damcay in uu Kiiniya yimaaddo. Aabbe waxa uu ahaa dadka aadka ehlu diinka u ah ee shuyuukhda lagu tilmaamo.

Wuxu yimi magaalada Libooye Kiiniya oo markii uu ka soo dagay la xidhay. Salaaddii buu is yidhi tuko hayeeshee nimankii Kiiniyitaga ahaa baa la dagaalamay oo u diiday. Ka dib dadkii kale ee dhallinyarta aha ee islaamka ee jeelka ku xidhnaa ayuu u yeedhay oo wuxuu yidhi "maydaan muslin ahayn? Ha la tukado." Ka dib waxay ku yidhaahdeen "waxa na dilaya askarta." Wuxu yidhi "markaa haddii ay maanta idin laayaan, oo idinka oo salaaddiinna ku jira aad dhimataan ama wax idinla dhacaan, waxa laga yaabaa in berrito intiina idinka soo hadhaa caadi u tukadaan. Markaa salaaddiina iska tukada, anaana idiin bilaabayee". Salaadii ayuu galay waanu tukanayay isagoo jeedal lala dhacayo. Isla markaa waxa ay dadkii kale bilaabeen inay ku daydaan oo salaaddii tukadaan. Sidaas

ayuu jid u furay oo ay salaaddoodii ku tukadeen. Jeelka waxa uu ku xidhnaa muddo 13 cisho ah, ka dibna markii waxba lagu waayay waa la iska soo daayay.

Waxa aan ka bilaabay dugsigii hoose, Nayroobi. Muddo gaaban ka dib waxa reerkayaga u soo baxay is-xanbaar dalka Norway ah oo uu soo saaray oday abtigay ah oo ay hooyaday walaalo yihiin. Ka dibaabbe oo ahaa dadka diinta aadka ugu dhaggan ayaa yidhi, 'carruurtaydu way iga gaaloobaysaa haddii waddan gaaleed la iga geeyo islaantana waannu kala tagaynaa haddii aad carruurtayda iga dhoofiso, inaguna isma sheegano. Carruurtayda ha la ii daayo dalkaygana ha laiigu celiyo."

Waxay ahayd sannadii 1994 markii aabbe diidaday isboonsarka naguna qasbay in aan u soo guurno dalka Soomaaliya.

Waxa aan halkii ka sii amba qaaday waxabarashadii dugsiga hoose inkasta oo aan markii danbe aan ka tagay magaaladaydii maadaama waxbarasho tayo leh aan ka waayay marka loo eego Kiiniya. Wax la ii wareejay magaalada Hargaysa, halkaasi oo aan kula noolaa inaadeerkay iyo eddaday. Ka dib halkaa waxaan ka dhammeeyay dugsigaygii dhexe, uguna gudbay dugsiga sare.

Raacdadii Aqoon Tayoleh

Markii aan dugsigii sare dhamaystirtay sannadii 2006 waxa aan hindisay in aan jaamacad aado. Ka dib waxa aan u soo bandhigay wiil jaamacad Maraykanka ka dhigta oo aan ilmo-adeer nahay, isagaa markaa wuxuu igu qalqaaliyay oo igu sii dhiirigaliyay in aan jaamacadda aado. Wakhtigan Soomaliland ma lahayn jaamacado tayo leh, Hargaysina malahayn jaamacadaha hada ku yaal.

Sidaa awgeed waxa aan go'aansaday in aan Hindiya aado si aan uga barto shahaadada koobaad. Hargaysa ayaa aan ka baxay waxa aanan qaatay taysaro iyo dukumentiyo kale si aan u codsado baas-aboorka Itoobiya.

Addis Ababa waxa aan kula kulmay dad badan oo Soomaali qaxooti ah. Dadka qaybi Maraykanka ayay u socotaa, qaybina

Ingiriiska, qaybiba meel. Marka ay i waydiiyaan xagga aan u socdo, waxa aan u sheegi jiray in aan Hindiya waxbarasho u aadayo.

Markii aan muddo labo todobaad ah joogay oo aan marayo nidaamkii aan ku heli lahaa baasaboorkii itoobiyaanka aha, ayaa waxa ila soo hadashay gabadh aanu ilmo-abti nahay oo ku nool dalka Maraykanka. Dabadeedna, waxay ii soo bandhigtay in ay hayso is-xanbaar saddex qof ah, wiil iyo labo gabdhood oo maraykanka ah. Wax ay igu tidhi "Maxamed, maadaama aad tahay inan dhallinyar ah oo dadaalaya oo waxbartay, waxaan jeclahay inaad jaamacadda ka gashid Maraykanka, halkaana aad ka shaqaysid oo aad qoyska u shaqaysid kadibna aad nolol, shaqo iyo waxbarasho ka heshid."' Runtii arrinkaasi wuu i qanciyay waxa aanan ka istaagay in aan Hindiya jaamacad u aado.

Is-xanbaarkii Maraykanka

Waxa aan qalqaaliyay sidii aan is-xanbaarka aan ku mari lahaa. Waxay ii sheegtay in is-xanbaarku saddex bilood ka dib uu soo baxayo oo aan u dhoofayno dalka Maraykanka. Markaa waxay igula talisay maadaama oo aan jaamacadii aan iska daayay oo aan barnaamijkeedii qaatay, in aan qoyska kalena u sheego kuna soo qanciyo qorshaha dhoofka.

Waxaan ku soo noqday dalkii. Waxa aan soo gaadhay Hargaysa oo ay qaraabadayda badhkood joogeen si aan ugu bishaareeyo in aan helay is-xanbaar dalka Maraykanka ah. Iyaga naftoodu aad ayay u xiisaynayeen wayna soo dhaweeyeen. Sidaas oo kale dad badan oo aanu saaxiibbo ahayn markaan u sheego in aan Maraykanka tagayo, soo dhawayntii ay ii hayeen iyo saaxiibtinimadoodii way sii kordhaysay.

Waxa aan u socdaalay Ceerigaabo oo aan ugu imid hooyo iyo walaalahayga yar-yar oo qaybi dhalatay intii aan dugsiga sare Hargaysa kaga jiray. Runtii iyagana waan u bishaareeyay barnaamijka aan waday ee ahaa in aan Maraykanka tagayo. Way soo dhaweeyeen

dhammaan, hooyana way igu taageertay. Waxa ay is lahayd wiilkaagi wuu dhoofayaa shaqana tagayaa si uu kuu soo caawiyo.

Aabbo ma joogin waddanka markaan qalqaalsanayey is-xanbaarka. Waxa uu joogay waddanka Isutagga Imaaraadka Carabta. Aragti ahaan go'aankaas anaa iska lahaa maadaama aan isu arkayey nin mudakar ah. Dhab ahaan way adkayd in aan aabbo u sheego arrinkan sabobta oo ah wuu ka soo hor-jeeday waana sabobtii uu noo keenay Soomaaliya. Hadda iyo maanta aabbe ma jecla fikradda socdaalka inkasta oo aan waynaaday oo aan dugsigii sarena dhammeeyay. Aniga xagayga aad ayaan arrintaas ugu heellanaa.

Qaarabadii ayaa aabo ku qancisay inuu qaato qorshahaa dhoofka. Sidaa darteed aabbe waxa uu igula taliyay in aan guursado inta aanan tagin, wuxuuna yidhi, "haddi uu ninkaasi tagayo oo aad idinku u ogalaateen, anigu waan ka soo horjeedee laakiin waa inuu guursadaa." Aabbe runtii waxa uu jeclaa in aan guursado gabadh aan markaa ilmo-adeer aan nahay oo aan aad iskugu dhawnahay oo aan walaashay u haystay. Fikirka uu watay waxa uu ahaa fikir carbeed oo carabta dhaqankooda ayaa waajib ka dhiga in ay is guursadaan ilmo-adeerta rumaad. Ma aanan jeclaysan fikraddaas waa aanan ka soo horjeestay. Run ahaantii dad badan ayaa fikirkii igu raacay. Tani waxay ay keentay in aan aabbe sii kala durugno. Aabbe hadalkii ayuu iga xidhay, taleefannadi ama xidhiidhkayagiina sidiisii hore wuu ahaan waayay. Haseyeeshee mar haddii aanu dalka joogin wax uu igu qasbi karaa waqtigaa ma jirin.

Dhawr bilood ka dib, dadkii iyo dhulkii waa an wada macasalaameeyay, kadibna waxa aan ku noqday dalkii Itoobiya wax yar ka hor sannaddii 2007.

Qorshaayaashii Dhicisoobay

Laba bilood ayaan joogay Itoobiya markii ay gabadhii ii soo sheegtay in isxanbaarkii la joojay oo la yidhi laguuma ogolaan karo waqtiga kan waayo shaqada aad haysid ayaa aan ku fillaan karin in aad dad keensatid dalka kan, sidaas darteed marka aad shaqo

wanagsan heshid ayaa dadka laguu soo qaadayaa.

Runtii arintii markii ay ii sheegtay naxdin bay igu noqotay waayo waxa aan ahaa qof xiisaynaya inuu dhoofo aaminayna in uu dhoofayo muddo yar ka dib.

Ka dib waxa aan la xidhiidhay qaar qoyskayaga ka mid ah waxa aanan u sheegay waxa dhacay. Markan waa uu iga baxay qorshihii jaamacadda oo waxa iga guuxayay in aan ka midho dhaliyo qorshahakan ah dhoofkii aan galay.

Qoyskii aan laxidhiidhay waxa ka mid ahayd islaan eeddaday ah oo runtii aad u firfircoon. Waxa ay la xidhiidhay dad badan oo qoyska ka mida iyada oo waydiinaysa cid is-xanbaar u soo baxay. Eeddaday waxa ay samayn jirtay marka uu Isboonsor u soo baxo, dad kale ayay qaadi jirtay. Ka dib wiil aan qaraabo nahay, ayaa loo oggolaaday in uu qaado toddobo qof. Toddobadii qof ayuu igu daray. Waxa uu ii sheegay in is-xanbaarkii ii soo baxay waraysigiisa laga marayo magaalada Nayroobi ee dalka Kiiniya.' Markan waxa aan joogaa Itoobiya oo waxay ay noqotay in aan qalqaashado sidaan u tagi lahaa Kiiniya.

Sidaa darteed waxa aan sameeyay xidhiidh badan oo la xidhiidha qaabka loo tagi karo Nayroobi. Waqtigaa baasaboorka Soomaaliga waxa lagu tagi jiray fiiso la'aan Yugaandha, ka dib baa Yugaandha Nayroobi laga soo tagi jiray waayo Kiiniya ma ogolayn baasaboorka Soomaaligaa in si toosa laagu tago. Waxa aan markaa ka soo baxay dalka Itoobiya soona galay dalka Soomaalilaand. Wax aan imidday Hargaysa. Ka dib waxa aan dalbaday fiisaha Yugaandha. Waxa aan raacay Ethiopian Airlines. Waxa aan tagay markaa Yugaandha oo markii aan ka degay dalku-gal la i siiyay

Taarikhdu waa bishii koowaad ee 2007. Waxa aan ku nagaaday hal habeen kadinba waxa aan uga sii gudbay dalka Kiiniya caasimaddiisa Nayroobi. Halkaas waxa iiga horreeyay qayb ka mid ah qoyska oo igu soo dhaweeyay. Ka dib waxa aan galay qorshihii ahaa in aan doono dadkii aan wada maraynay waraysiga is-xanbaarka. Toddobadii qof ayaanu isla doonanay. Ka dib waxa aan hellay xogtii

iyo xilliga waraysiga la galayo. Waxa aannu samayn jirnay kulamo aanu isukugu diyaarinayno waraysiyada.

Qorshahii isboonsarku waxa uu bilawday bishii Juun 2007. Maalintii u horaysay waxa aan tagnay safaaradda Maraykanka oo waraysi nalagula yeeshay. Waxa aan ku guulaysanay in sawirkii u horeeyay nalaga qaado, anaga oo sidoo kale ku guulaysanay waraysi-wadareedkii nalala yeeshay.

Muddo ka dib isaga oo barnaamijkayagii meel fiican uu marayo oo aan waraysigii labaad marnay oo aan sugayno in caafimaadkii la hubiyo iyo in aan hello xogtii duulimaadka, ayaa waxa la soo kordhiyay tallaabbo cusub oo ah in DNA -da dadka dhoofaya iyo kuwa dhoofinaya la isku eego.

Hadda ka hor caafimaadka waa la baadhi jiray hayeeshee DNA lama shaybaadhi jirin. Sidaa ayay kumannan qof oo Soomaali ah qorshahoodi is-qaadistu ku burburtay.

Waan xasuustaa maalintii naloo soo sheegay, anigu waxaan aaminsanaa in aan maalmo ka dib aan dhoofayno oo aan Maraykanka ka dagi doono oo aan ka shaqaysan doono. Markii naloo soo sheegay waxa ay nagu noqotay arrin niyad jab ah oo aad nooga nixisay. Dadka qaybtood way suuxeen saddex ilaa afar cishana way xanuunsanayeen, dadka qaybtii runtii wayba xanuunsatay oo cisbitaalada ayaa la geeyay, qaybna waxaa aan u malaynayay in ayba waalatay dhoof jacayl iyo sida ay iskaga dhaadhiciyeen in ay qurbaha tagaan darteed.

Runtii, markaa waxa Kiiniya ku sugnaa Soomaali aad u fara badan oo waqtigaa dhoof wada sugaysa. Waxaad arkaysaa dad badan oo isla -hadlaya oo qaybtood waasheen, deedna markaad waydiiso dadka ee aad tiraahdo,' dadka kan maxaa ku dhacay waxa ay ku leeyihiin dadka kan buufis baa ku dhacay. Oo buufiska ku dhacay waa maxay? Buufiska ku dhacay wax kale maahee dhoof ayaa uu sugayay oo ama isaga oo duulimaad sugaya ayaa dhoofkii laga joojay ama waxaba ka dhacay barnaamijkii ka dib qofkii

waalanayo. Markaa buufiskaa ama dhoofka waxa aan ahayn dadku kama sheekaynayn markii aan Nayroobi soo galay.

Runtii, qorshahii dhicisoobay saamayn ayuu igu yeeshay oo waan ka naxay barnaamijkaas. Laakiin dadka qaybtii sidii uu saamayn ugu yeeshay iiguma yeelan, waayo tabo-bar hore ayaan qabay maadaama mar hore qorshe kale iga qabyoobay.

Halkaa waxa aan ka galay qorshihii aan meel kale ku aadi lahaa. Dadku qorshayaashii ay meelo kale ku aadi lahaayeen ayay samaysteen. Qaytood ayaa qaadanaysay baasaboorkii Kiiniya ka dibna ku tagaysay Baraasiil. Qayb kale oo ay lacagohooda u yaalleen bangiyada is-xanbaar iyo baasabooro ayay ku iibsanaysay. Waxa jiray dad lacag u taallay xawaaladaha ilaa 10,000 oo doolar ah. Dadkaas oo kale way u fududayd in ay markaaba tagaan oo 6,000 ilaa 7,000 kun oo doolar ay siiyaan madaxda laanta-socdaalka, ka dibna sidaa ay ku gudbaan. Laakiin aniga marka lacag la'aan ayaan ahay oo hawshani iima fududayn.

Marwalba waxa iga go'nayd in aan dhoofo maaddaama aan rumaysnaa in noloshaydu si dhakhso ah isku baddali doonto. Sidaa darteed waxa aan go'aan ku gaadhay in aan baxsho 10,000 oo doolar si aan Baraasiil u tago.

Si qorshahani iigu hirgalo waxa aan la xidhiidhay dad ay ka mid ahaayeen oday adeerkay ah iyo islaan eeddaday ah oo Maraykan jooga. Ka dib waxa ay ii soo bandhigeen in aan qorshahii jaamacadayda aan ka maqnaa sannadka in aan dib u bilaabo oo aan Hindiya iyo qorsheheedii soo celiyo.

Runtii, aniga way igu adkayd maaddaama qorshahaa aan ka gudbay oo qorshihii kale ee dhoofka ahaa wali igu qufulanyahay. Sidaa darteed waa aan ka diiday qorshahoogii.

Waxa aan u sheegay in ay iyagu burburiyeen qorshahaygii hore ee waxbarashada iina soo bandhigeen dhoofkii Maraykanka. Waxa aan ku wargaliyay in aan dabasocdo qorshe dhoof oo aanan ka hadhayn inta aan ka midho –keenayo. Way isku kay qaban waayeen labada qorshe ee ah dhoofka iyo waxbarashadu.

Sidaa darteed, khilaaf ayaa na dhex yimid. Midkasta waxa uu ku adkaystay go'aankiisii. Ka dib waxay noqotay in aan teleefonnadii iska xidho go'aanna qaato oo aan idhaahdo dadkani ma xiisaynayaaan inay wax kula qabtaan ee aduu bal noloshaada meel saar. Runtii, go'aankani waxa uu igu kaliftay in aan xidhiidhkii u jaro, iska joojiyo biilkii la ii soo diri jiray aanan wax aan cuni lahaa raadsado.

Noloshii Islii (Eastleigh)

Intaa ka dib, waxa igu adkaatay in aan maareeyo noloshii. Wali waxa aan ku suganahay Nayroobi. Hadda ka hor biil baan heli jiray, waxa aan iska ahaa inan yar oo iska dharagsan, labiskiisa iyo waxkasta oo u baahdo hela, jeebkastana lacag ugu jirto. Waxaa bilaabantay marka aan guriga ku noqdo aan is waydiiyo xaggee ayaad cunto ka doonataa, gurigan aad seexanaysid sideed kiradiisa u bixisaa. Labadii bilood ee xigay waxa aan ku noolaa nolol aan loo adkaysan karin

Ka dib, waxaan bilaabay inaan shaqo raadiyo gaar ahaan xaafadda Islii. Qolyo ganacsato ah oo aan qaraabo nahay ayaan shaqo waydiistay, way ii waayeen oo waxay ii sheegeen in shaqadu buuxdo. Dabadeedna waxa aan bilaabay in aan shaqaalahooda ka caawiyo iibinta alaabada iyo diiwangalinta dhaqdhaqaaqyada waxkala iibsiga. Arrintani waxa ay keentay in qolyihii aanu qaraabada ahayn yidhaahdaan ninkani qoraalkiisu wuu wanaagsan yahay. Dadkii waxa ay igu jeclaadeen qoraalka oo ay lacag igu siin jireen. Mid ka mid ah oo aan qaraabo ahayn ayaa yidhi annaga noo joog xafiiska qoraalkaana noo sameey lacagta baxda iyo lacagta soo gasha iyo ganacsiga kala soconaya. Ka dibna qoraalkaas ayaan u samayn jiray. Habeenkii waxa la i siin jiray lacag yar oo gaadhaysa 12 doolar waayo qoraalkaa maanta aan samaynayo baa wuxuu yahay qoraal gaadhaya lacag malaayiin doolar ah. Markaa runtii waxay ninkii u noqotay hawl fudaydin anaa waxa ay ii noqotay shaqo.

Markiii aan la shaqaynayay muddo saddex bilood ah ee ay ii

dhigantay lacag 170 doolar ah waxa igu dhalatay dalkii ku noqo maadaama noloshu igu adkaatay. Aniga oo markaa raba in aan lacag fiican ursursado dalkiina kula noqdo ayaan ninkii u tagay oo waxaan aan ku idhi mushaharka in la ii kordhiyo ayaan rabaa. Runtii wuxu igi yidhi waan ka soo fikiraynaa. Maalin ka dib ayuu ii yeedhay, wuxuna yidhi, 'waxaan kuu hayaa shaqo tan ka duwan oo ganacsi yar oo dhar ah baan kuu furayaa, dabadeedna alaabtaas ayaad iib-inaysaa. Lacagta lafteeda uun baad ii soo celinaysaa faa'iidadana adaa qaadanaya". Dhabtii, waan ku farxay. Ka dib meheraddii uu haystay horteeda ayuu meherad yar iiga sameeyay. Muddo laba bilood gudohood ah waxa i soo gashay lacag dhan 1300 doolar waayo si wanaagsan ayaan u faa'iday.

Bilawgii Tahriibka

Muddo ka dib waxaa soo baxay *tahriib* wax la yidhaado, oo ah in dadkii tahriibaan oo ay maraan Suudaan oo ay u sii gudbaan Liibiya. Kadib halkaa ay ka sii galaan Talyaaniga. Talyaaniga muddo joogaan oo ay Noorway, Hoolaan iyo dhulkii is-xanbaarka lagu tagi jiray ka soo hadlaan, iyada oo ay kharashkii hore mid ka yar uu ku baxayo. Runtii markii aay dadku kaaga sheekaynayaan way kuu fududaynayaan. Qaar ka mid ah asxaabtayda ayaa ila soo xidhiidhay oo internet-ka aad u isticmaala waxayna ii sheegeen in ay qaybtood joogaan Noorway, qaybna Hoolan, qaarna Ingiriiska oo ay wadada Liibiyana ay mareen, markii ay ku guul daraysteen fiisayaashii iyo is-xanbaarkii Maraykanka iyo dhoofkii sharciga ahaa ee markaa dadka qoxootiga ahaa lagu qaadi jiray.

Markay barnaamijkaa iiga sheekeeyeen oo waliba sawirro qurux badan iyaga oo ku jira ii soo direen iyaga oo daaro dhaadheer isku soo sawiray oo ku jira noloshii nolol ka duwan, xidhan labiskii labis ka duwan, waxaan ku fikiray inaan lacagta in yar korodhsodo, ka dibna aan waddadaa maro maadaama oo aan reerkayagii xidhiidh fiican lahayn, dhoofkiina aan ku guul daraystay, waxabarashadiina waqtigii iga lumay aadna aanan u xiisaynayn in aan sii wado

Markii aan shaqeeyay ee lacagtii aan ururSaday ay marayso 1,700$ meelahaa waxa aan raadiyay cid xaggaa iyo Liibiya tagaysa oo tahriibta galaysa.

Kama danbayn, waxa aan helay wiil dhallinyara ah oo aan saaxiibbo ahayn oo u dhashay Kismaayo oo Kiiniyana ku koray. Waxa uu igu yidhi "waddadaas ayaan marayaa saaxiib dhoofkiina halkan buu ka fududaaday, dee maxaad arin haysaa?" Anna waxaan ugu jawaabay "saaxiib aniguba barnaamijkan in badan ayaan ku fikirayay inaan aado, noloshii kale oo dhan hadda way igu soo adkaatay markaa waxaan rabaa in aan waddadaa maro."

Waxaan aan xasuustay in aan haysto oggolaanshaha jaamacadda iyo baasaboor Soomaali ah. Guntintaydii iyo lacagtaydii yaraydna waan soo qaatay, cid aan u sheegay oo aan u bandhigay qoyskayaga ma jirin inaan meel aadayo. Ka dibna inankii baanu isa soo raacnay waanan soo ambabaxnay. Wexay ahayd dabayaaqadii 2008. Madaxweyne Obama ayaa la dortay.

QAYBTA LABAAD
Tahriib

Qorshahaygii socdaalka Maraykanku waxa uu isku baddalay in aan galo waddada dheer ee tahriibta Liibiya [kadibna Yurub]. Waddadan dheer waxa igu dhaliyay inan aannu saaxiibbo nahay, oo iyada oo fikirkaasi igu jiro igu sii xoojiyay. Ka dib waxa aannu qabanqaabsannay safarkayagii aan ugu bixi lahayn Yugaandha oo ah meesha ugu horraysa ee loo anbabaxayo. Waxa aannu soo goosannay tigidhada basaska waawayn ee u baxa Uganda. Annaga oo aamminsanayn in safarkii aannu ku tagayna Yurub, ama dalalkii aannu intabadan hindisaynay soo dhawaaday oo aannuu muddo yar oo kooban ku tagayno.

Waxa aan macasalamaynay Nayroobi, baskii ayaannu raacnay oo waddada nala qabsaday abbaara shantii galabnimo. Waxa aannu soconnay muddo toban saacadood ah markii aannu gaadhnay isbaaraddii ugu horraysay oo ahayd tii laga galayay dalka Yugaanda. Markii ugu horraysayba waxa nagu soo dhacday" hadda Yugaadha ayaad galaysaan waana waddan kale, waxaa la idin waydiinayaa sharci. Sharcina ma sidataan haddaba sideed uga baxaysaan." Markaa niman dhallinyaro ah oo nala socday oo sharci sitay ayaa waxay nagula taliyeen in aannu dhuumanno oo kuraasta hoosteeda gallo. Ka dibna askartii gawaadhida baadhaysay aya soo gashay gaadhigii. Nasiib wanaag nama ay arag. "Tolow armay askartani idin qabataa oo idin mooddaa nimanka laga baqo ee Alshabaab". Nasiib wanaag gaadhigii waxba kama ay helin waa ayna ka dageen.

Rakaabkii ayaa soo fuulay muddo yar ka dibna waxa aannu dhexjoognay Yugaandha. Huteel ayaannu ku dagnay anagoo

qabanqaabsanayna safarkaannu ugu gudbi lahayn Suudaan oo wakhtigaa aan u kala go'in laba dal. Waraysi ka dib waxa naloo sheegay in gawaadhida la raacaa ay tahay booyadaha shidaalka oo la isku ekaysiiyo kirishbooyga ama in lacag dhan 700 oo doolar la siiyo mukhalasiin dadka geeya Suudaan. Lacagta ay qaadanayeen wa ay badnayd maxaa yeelay waxa ay ogaayeen in Soomaalidu markasta degdegsantahay maaddaama ay tahriibayaal sharci darro ah ahaayeen.

Huteelkii aannu ku degnay ayaannu kusoo noqonnay oo aannu iska waraysannay waxa aannu yeeli lahayn. Waxa noo soo baxday in lacag waxa aannu haysanaa naga dhammaanayso annaga oo aan xataa Khartuum gaadhin. Ka dib innamadii huteelka degganaa ayaa aan la tashannay waxayna nagula taliyeen in aannu soo goosanno waraaqo yar yar oo caddaynnaya in aannu nahay ganacsato. Intaa ka dib waxa aannu u ambabaxnay Suudaan sidii dad sharci haysta. Waxa aannu baxnay abaara siddeeddii aroornimo.

Socdaalkii Jubba iyo Khartuum

Baskii markii uu nala socday ilaa dhawr saacadood, ayaa la istaajiyay meel beeralay ah si dadku halkaa ugu nastaan, xajooyinkoodana ugu gutaan. Dadka Yuugaandhiiska ahi ma dagin. Laakiin Soomaalidu oo ay ku jiraan annaga iyo afar kale oo reer Xamar ah waan degnay.

Markii aannu is nidhi baska fuula oo aannu iskaga sheekaysanayno baska hortiisiina wax yar u soo jirno ayaa waxa na soo hor istaagay toddobo nin oo seefo sita. Layaab ayay nagu noqotay runtii. Ka dib *"wewe wewe"*[8] ayay nagu yidhaahdeen. Hadalkooda ma aannaan fahmin. Deedna waa aannu is dajinnay. Dadka qayb ayaa is tidhi carara. Iyada oo xaaladdu halkaa marayso ayaa mid Ingiriisiga yaqaannaa soo booday oo uu yidhi "is dajiya" waxa aanu ku daray "meesha tan aad u kaadi tagteen waa dhul beero ah. Dhulkiinnii maaha. Soomaalidu waa dad dhaqan xun oo dhulkooda dhul

8 Erayga *wewe* waa eray af-Sawaaxili ah oo macnahiisu yahay (Adiga)

aan ahayn ayay iskaga degayaan. Waxa la idinka rabaa markaa..." Markaa waraaq ay ugu talo galeen oo ay Soomaalida awalba ku baadhan jireen bay la soo baxeen. Waraaqda waxa ku qoran "Qofkastaa waxa laga rabaa lacag Yugaandhiis ah oo u dhiganta ilaa 30 doolar, maaddaama uu ku dagay dhul aanu lahayn oo ku soo kaadshay". Runtii layaab ayay nagu noqotay iyo argaggax. Haddana lacagtii markii ay noo sheegeen waanu yara nafisnay maxa yeelay in ay nala dagaalamayaan ayaannu nimanka marka hore moodaynay.

Waxa aan u sheegnay in ay degdeg tahay lacag intaa le'egnay aannaan haysan. Markii aan cabbaar la yara doodnay, ayaa qaybtood dagaal nagu soo qaadday. Kii Ingiriisida garanayay ee u dillaalka aha baa naga celiyay. Kadib lacag 40 doolar ah ayaannu siinnay waanay naga tageen.

Intaasoo dhan dirawalka baska iyo shaqaalihiisu way daawanayeen waxa dhacaya oo waa wax ay iska ogaayeen in qoladani dadka baadhaan. Halkaa waxa iiga muuqatay in dalkaaga markaad ka tagtid, in aanad waxba ahayn, si fudud laguu dili karo, si fudud laguu dhici karo oo qofkastaana kugu cashuuri karo dalkiisa xataa isaga oon waxba ahayn.

Runtii waxa aan u sii ambobaxnay xaggaa iyo xuduudda Suudaan. Waxaa naga hor yimid kastamkii ugu horreeyay ee dalka Suudaanta koonfureed. Ka dib Soomaalidii kale may sidan waraaqo, gaadhigina way ka dageen waa ayna soo lugeeyeen. Markii gaadhigii dhaqaaqay ayay dhexda nagasoo raaceen.

Waxa aannu soo gallay magaalada Jubba oo ah caasimadda Koonfurta Suudaan oo Soomaali badani ku nooshahay. Waxa aannu bilawnay qorshaha safarkii aannu ugu gudbi lahayn Khartuum, caasimadda Suudaan. Waxa aan ogaannay in niman mukhalasiin ahi dadka ka qaataan 700 boqol oo doollar geeyaanna meel la yidhaahdo Warwar[9] oo ah meel dadka lagu sii hayo inta aan loo gudbin Khartuum. Qorshahaasi se nama soo jiidan.

9 Warwar waa suuq ku yaal waqooyiga Baxral-qasaal ee u dhaw xadka Suudaan.

Waxa aan ku adkaysannay in aan sharcigii ganacsatada ku raacno baska. Baskii ayaanuu tigidhkii u soo goosannay aroornimadiina halkii ayaan ka sii anbobaxnay waxana nala socday dhallinyaro kale oo Soomaali ah.

Wax aannu soconaba goor makhribnimo ah ayaan meel kastam ah oo gawaadhida lagu baadho dadkana sharciyadooda lagu waydiiyo soo gaadhnay. Gaadhigii ayaa nalaga wada dajay waxa aanan tusnay waraqayahayagii. Soomaalidii kale maadaama aanay waraaqo sidan halkii ayaa lagu reebay. Kadibna gaadhigii markii aannu soo fuullay ee aannu dib isugu soo noqonnay ayaa waxa aan la sheekaystay wiil Suudaani ah oo af- Ingiriiska yaqaanay waxa uu ii sheegay in Soomaali badan halkan lagu reebto, waxii dumarana askartu kaxaystaan, raggana lacag badan laga qaado.

Safarkayagii ayaan sii wadanay waxa waraysi nala yeeshay nimankii kastamka magaalada Warwar ee xadka ku taalla. Waxa iigu la yaab badnayd inanka kale ee aannu wada soconnay waxa uu u ekaa Suudaani, anigu se nin dhuuban oo yara maarriin ah oo Soomaali asal ah ayaan ahaa. Dabadeed inta ishaa sidaa naloo mariyay ayaa la yidhi adigu "Soomaali, soo deg". Halkii ayaa waraysi la igula yeeshay sharcigaygiina igu waydiiyeen. Markii aan tusay waraaqdi ganacsiga, Soomaalidu halkan kama ganacsato ayaa la yidhi. Soomaalidu Jubbay ka ganacsadaan. Waxaan ku idhi waxaan rabaa in aan waxbarasho halkan ka dhammaystirto ganacsina aan ka sameeyo. Ma ahi nin laga shakiyi karo oo waxa aan ahay nin nabadeed.

Kuma sii dayn karro ayay yidhaahdeen.

Muddo markii aan halkii murmaynay, gaadhigiina uu wali taaganyahay, waxaa noo yimi nin sarkaal ah oo ciidanka haystay. Ka dib waxa uu igu yidhi maxaad ahayd. Waxa aan ku idhi Soomaali ayaan ahay oo Soomaaliduna way burbursantahay, sharci iyo baasaboorro fiisaysan ma sidanno. Laakiin waxa aan u soconnaa inaa aannu waxbarasho iyo dhaqaale raadinno. Markaa nolol iyo ganacsi ayaannu raadinaynaa. Wax aan rabnaa in aad na caawisid. "May may" buu

yidhi. "Qofku haddii aanuu sharci haysan anuu wax aan u samayn karaa ma jiro. Markaa wan ku celinayaa waxaan kugu celinayaa meeshii aad ka timi. Intaa ayaan wanaag kuu samayn karaa. Gaadhigan ayaan ku sii saarayaa sii socda." Runtii arrintaasi way igu adkaatay.

Ka dib waxa igu soo dhacday in sida Soomaalidu u burbursantahay oo bilaaa nidaamka isaga tahay iyo bilaa sharciga u tahay, in ay qolyahan naftoodu muddo dheer ay la dagaalamayeen Suudaan. Dabeed waxa aan ku idhi "maad ilawsantahay idinka laftiinu inaad burburkan oo kale aad soo marteen oo dadkiinnu meelo badan ku dayacnaayeen Itoobiya iyo Kiiniya, in aad labaatan sano bilaa dawlad ahaydeen, markaa tii oo kale ayaa anaga na haysata. Dadka wax idiin soo bartay wa dadka dalka wax ka badalay annaguna waxa aan rabnaa in aan dalka wax u soo baranno. Intaa igu caawi oo asxaan ii samee. Bani'aadnimo igu caawi, dhibka aad nala soo aragteen dartii igu caawi".

Markaa ayuu yidhi "runtii si wanagsanbaad u hadashay waanan ku caawinaya. Laakiin Soomaalidu dad wanaagsan maaha. Waayo dhawaan waxa ay qabsadeen maraakiib annaga hub noo sidday". Ka dib waxa uu i siiyay waraaq sharci ah oo aan Khartuum ku tago.

Khartuum

Intaa ka dib, waxa aan tagnay Khartuum oo ah caasimadda Suudaan. Haddaan magaaladii galnay waxa aan la kulmay wiilal dhallinyaro ah oo u shaqeeya tahriibiyayaasha oo u soo ogaada dadka raba in ay tagaan Liibiya. Dabadeedna way na soo kaxeeyeen. Nin ayay noo geeyeen mukhalas ah. Waxaan halkii ugu tagnay dhallinyar kale oo Soomaali ah. Guriga waxaa lahaa nin mukhalas ah oo la yidhaa Axmed oo ka shaqaynayey safaaradda Soomaalida. Gabadh yar oo hortaayo la keenay meesha ayaa igu tidhi "annagaba muddo dhawr bilood ka hor ah ayaa sidan oo kale naloo soo dhaweeyay. Ilaa haddana guri ayaannu ku xeraysanahay oo magaaladii waa nalaga ilaaliyay, si aannaan magaalada u fahmin. Waxa la rabaa in haddii

tahriibta aan ku fashilano aynaan garan meesha aan joognay".

Hadda waxa aan tabaabulshaheeda gallay safarkii dhabta ahaa oo ah kii Saxaraha. Waa safar sharci iyo waraaqo iyo khiyaamo aanay shaqaynayn. Nimanka ku maamulaya iyo gawaadhida lagu saarayo ayuunbaa kaa masuul ah.

Waxa ay nagu qaadatay in aan gurigii joogno muddo labo bilood ah, iyada oo dadka la isku ururinayo si gawaadhi waawayn loogu guro. Gawaadhidaas waxa la saaraa 90 qof, waxa se loogu talo gallay inuu qaado 20 qof. Markaa sagaashankaa qof waa in la isla helaa si kharashbadan looga ursado. Qofkii 500 oo doolaar ayaa laga qaadaa si loo gudbiyo loona gaadhsiiyo xadka Liibiya.

Muddadii la isla sugayay dadka, Axmedkii mukhalaska ahaa ee meesha joogay wax qabadkayagii inta uu ka helay ayuu yidhi aniga iyo saaxiibkay "idinku dad soo ururiya si safarku idiinku fududaado'. Waxa aan dhexgallay Khartuum, oo dadkii qayb qabiil ayaan ugu marmarsiyoonay, qaybna degaan si aan u soo jiidanno. Dad badan ayaan u soo ururinnay. Markaa lacagtii ayuu wax naga dhimay. Dadka 5 boqol oo dollar ayuu ka qaadayay, annaga se 350.

Kama danbayntii tiradii loo baahnaa ayaan gaadhnay. Guri wayn ayaa nalagu ururshay goor habeennimo ah. Dabadeed, basas yaryar oo caasi ah ayaa nala saaray oo na geeyay guri kharaabad ah oo magaalada dhinaceeda ah oo aan lahayn biyo. Habeenkii hore dhaxan iyo wax aannaan ku talo galin ayaan ku seexannay. Ka dib markii aan habeenkii meeshii u hoyanay ayaa aroortii hore shantii haddana nala saaray saddex gawaadhi oo yaryar oo Cabdibile ah oo midkiiba qaadayo 20 qof. Safarkii ayaa bilawday oo dadkii waa la isa saarsaaray. Waxa aad la yaabaysaa gaadhiga maadaama loogu talo galay in uu qaado dad tiro yar, dadkii inay dusha isaga bax-ayaan. Gaadhigu dhigo ma laha, meel kale oo la qabsadana ma laha. Dadku waxa ay ku qasbanyihiin midba in uu mid kale qabsado. Gaadhiga nimanka wadaa u nixi maayaan. Way eryayaan dabadeedna nin kastaa naftiisa sida uu u badbaadin lahaa isagay jirtaa. Waa is giiji, kakale qabso oo dadku way isku wada dhaganyihiin. Midkood

ayaa bir haysta, dadkuna kanay kuwada dhagsanyihiin. Gaadhigu hal mar ayuu sida u socdo hawadaa u boodayaa dhulkuu ku soo dhacayaa, markaas ayaa dadku inta ay hawada u boodaan ku soo dul daadanayaan.

Saxarihii Suudan

Markii ay gawaadhidii ay nala socdeen muddo maalin iyo habeen ah ayay meel na dajiyeen saxaraha dhexdiisa ah oo nagaga tageen. Waxyar dabeedna waxa noo yimid saddex Cabdibile oo sida sagaashan Suudaaniyiin ah oo si sharci darro ah u tagaya Liibiya si ay shaqo u helaan. Meel gooni ah ayay Suudaantii degtay. Soomaalidiina meel gooni ah bay degtay. Ka dib waxa la yidhi waxa idiin imanaya gawaadhidii waawaynayd ee idiin qaadi lahayd xaggaa iyo Liibiya

Meesha aan degnay aad ayay u qaboobayd. Run ahaantii markii hore ku tala galkayagu waxa uu ahaa in aannu soconayno shan cisho iyo wax la mid ah oo dad naga horreeyay noogu sheekeeyeen. Aniga iyo saaxiibkay waxa aan sidanay kiish badhkii oo ay ku jiraan waxooga timir ah, sharaabka la qaso iyo caagado biyo ah.

Halkaa waxa aannu degganayn saddex cisho oo aan isticmaalay kalabadh sahaydii aan sidannay. Haddana dadku ma walwalsana maxaa yeelay waxa ay filayeen in sahayda hadhay safarka ku filantahay. Rag iyo dumar ayaa safarka ku wada jira. Wiilasha qaybtood ayaa la haasawaya, la kaftamaya oo tamashlaynaya oo la qoslaya gabdhaha. Dadku markaa way is xiisaynayaan, way is jecelyihiin oo waa dad safar u wada socda. Waa la wada qoslayaa, waa la wada sheekaysanayaa, qofkastaa qofka kale ayaa uu ka waraysanayaa waxa dhib soo gaadhay.

Ka dib saddexdii cisho waxa noo yimidday gawaadhi waawayn. Gawadhida marka aan qiyaasay waxa ay qaadi karaan oo loogu talo galay 40 ilaa 50 inta u dhaxaysa. Kadib waxa ay yidhaahdeen Soomaalida intii is raaci karta waxa la rabaa in aad noqotaan laba kooxood oo 40 iyo 50 kala ah. Intii is fahmaysaysaa way is raacday.

Gooni baanu isku raacnay. Suudaantiina sidoo kale. Waxa aan ku biiray koox 40 qof ah oo reer Koonfureed iyo reer Waqooyi isugu jirta. Dabeedna waxa la sameeyay dadkani si aanay khilaaf u keenin 40kii Soomaalida ahayd 50 Suudaan ah ayaa lagu daray. Kontonkii kale ee Soomaalida ahaana waxa lagu daray Afartan Suudaan ah.

Sidaa ayaan ku anboqaadnay safarkii. Waxa ay noqotay qofkastaa in uu kiishkiisii kor u qabsado oo alaabtiisii hayo waayo dadku way taaganyihiin meel gaadhiga laga fuulaa ma jirto. Gaadhi loogu talo galay konton qof ayaa waxa la saaray sagaashan qof waana la is dul saaran yahay. Waxa jiray cidhiidhi dhib badan, hase ahaatee dadku is leeyihiin safarkiinii ayaa idiin bilaabmay meeshii ayaa soo dhaw ku sabra oo u adkaysta cidhiidhiga kan.

Maalintii iyo habeenkii oo dhan ayaa aannu sii soconnay. Nimanka gaadhiga wadaa niman naxaya ma aha. Waa niman maandooriye isticmaalaya. Habeenimadii sidii aannu u soconnay ayaa uu gaadhigii meel god ah lug kula dhacay. Gaadhigii ayaa dhinac u dhacay. Gabigayagiina dhinac ayaa aannu iskugu daadannay oo qofba meel ku dhacay. Dareewalkii muraayaddii hore ayuu ka dhexbaxay isaga ayaana ugu dhaawac waynaa. Ninkii kale oo isaguna kirishbeyga ahaa, Turayahii uu isticmaalayay ayaa ka kala jabay, isna meel ayuu ka dhacay. Dadkii kale ku yar oo aan garanayo oo aan saaxiibbo nahay bir ayaa gacanta dillaacisay oo dhiig ayaa socday. Safarkayagii halkaa ayaa uu ku joogsaday.

Ka dib dadkii wax gaadheen caawimaddoodii iyo wax u qabashadoodii ayaannu bilawnay. Dhaawacu fudayd ayaa uu u badnaa dhimashana ma dhicin. Meesha la marayo geed iyo guri toona kuma yaal oo waa saxare. Saxarihii dhabta ahaa ee ciidda ahaa ayaa bilaabmay. Buuro ciid ah oo habeenkii guuraya ayaad arkaysaa oo meel aad xalay ku ogayd buur oo aroortii bannaan ah. Saxare aad u dhib badan ayuu ahaa. Qoladayadii Soomaalida ahayd waxa aan degnay meel yar oo buur hoosteed ah. Qoladii kale ee Suudaantiina gooni ayay u dageen. Dabadeedna dadkii dhaawaca ahaa halkii ayaa

lagu dhayay oo uu ku jiro dirawalkii gaadhigu. Yarkii kirishbayga ahaa dadka ayuu dajinayay oo uu sheegayay in gargaar imanayo.

Muddo saddex cisho ah ayaan sii joognay oo cunnadii yarayd naga sii gabaabsi noqotay. Waxa aan bilawnay in aan is waydiinno sida wax u socdaan. Habeenkii waxa soo dhacaysay dhaxan qabaw oo aannaan tamar u hayn. Nasiib wanaag waxa aan ku beegannay wakhtigii qabawga oo haddii ay ahaan lahayd xilligii kulaylka dadku maba noolaadeen harraad baa dhammayn lahaa.

Iyada oo sidaas xaalku yahay ayaa kiriishbaygii tagay meel yar oo dooxo ah. Waxa uu ka soo helay gaadhi markaa joogay iyo niman Turayayaal haysta. Halkii ayaa nalaga daad gureeyay oo nala geeyay meeshi yarayd ee dooxada ahayd. Halkii ayaa haddana aan sii joognay laba maalmood oo kale. Kadib dadkii waxa ka dhammaaday cunnadii. Waxa ay iska warsadeen waxa ay samaylahaayeen. Waxa ay ka fikireen in ay dib ugu lugeeyaan Khartuum inkasta oo ay fogayd.

Iyada oo wali aan hindisihii hadal haynno, ayaa waxa noo yimid nimankii tuulada yar deggannaa oo ah reer miyi. Waxa ay sitaan dhawr qori oo G3 ah waxa aanay saaranyihiin dhawr dameer iyo dhowr awr. Dabadeed odaygii u waynaa ayaa yidhi "Soomaaliyeey wax ma idiin sheegnaa meeshani dhulkiina ma aha, Soomaali ayaad tihiin, lacagayaa aad sidataan, waxa aannu u baahanahay lacag". Calaa qof waxa ay sheegeen in ay ka rabaan lacag u dhiganta $50 oo marka la isku geeyo noqonaysa 2000 oo dollar afartankayaga qof. Qori ayuu sitaa odaygu, ciidankiisana wuu wataa. Dabadeedna waxay noqotay in la is waydiiyo waar jabhaddani yar maxay ahayd. Markii aan murannay cabbaar ayuu odaygii yidhi: "Adeer haddaad leedihiin lacag bixin mayno, ciidda tan aad saaran tihiin waa Suudaan, aniga ayaana deggan. Guryahaygii ayaad iigu timaadeen, hadda ma garanaysaan? Lugaha ka qaada oo hawada istaaga. Hawada haddaad istaagtaan, waan idiin oggolaanayaa in aad meesha joogtaan. Laakiin haddii aad rabtaan in aad meesha

lugaha ku haysaan oo aad taagnaataan, waa ciiddaydii ee lacagtaa bixiya."

Arrini way adkaatay oo dadkii way isku noqdeen waxa ayna yidhaahdeen "maxaan samaynaa? Cunnadii waa ay innaga dhammaatay oo waa an dayacannahay. Haddana lacag ayaa la ina sii waydiinayaa. Yaa Ilaahayoow dawlad na siiya? Waxa aan ku tashannay in inta aan tamartu naga dhammaan aan Khartuum u lugayno. Qolo kale ayaa tidhi lugayn mayno oo meeshii waqti badan ayaynu ka soo soconnay. 1000 km meelahaas ayaa an ku dhawnahay waxana noo hadhay waa 3000 km.

Xaaladdii markii ay adkaatay, qoladii Suudaanta ahayd ayaa aan nin u dirnay oo ku yidhi "annagu Soomaali ayaan nahay, dalkayagiina ma joogno. Idinkaa dalkiinii jooga, nimankan kale ee Suudaaniyiinta ah ee hubka sita ee raba in ay wax na waydiiyaan la hadla. Hadday dagaal noqotana waan la dagaalamaynaa. Nagala hadla idinka ayaa dalkiinnii jooga e." Waxa ay yidhaahdeen "nimankan dhulkoodii weeye oo iyaga ayaa leh. Iyaga ayaa ka masuul ah. Waxay idin weydiiyaan bixiya". Mid naga mid ah ayaa yidhi nimankan budhcadda ah waxa ay wada shaqaysanayaan dareewaliinta, ee aynu isku dayno in aynu lugayn karno oo aynu go'aan qaadan karno waayo inaggu lacag ayaynu bixinnay oo magaaladii haddaynu ku noqonno lacagtii ayaa aan wadydiisanaynaa mukhalaskii in uu inoo celiyo.

Waxa aanu isku raacnay in aan u lugayno Khartuum.

Alaabtii ayaa aan qaadannay lugna bilawnay. Cabbaar markii aannu soconnay ayaa Suudaantii hadda na lahayd Soomaali ayaad tihiin ee waxaad doontaan iska bixiya soo yaacday iyaga oo leh "walaalayaal ha naga tagina. Safarka ha inaga kala daadinina. Jooga". Waa aannu is yara adkaynay ilaa ay noo ballan qaadeen in tahriibiyayaashii ay imanayaan. Sidaa awgeed waa an ka noqonnay go'aankayagii waa aannan joognay. Waxa naloo soo diray gaadhi sida cunto sida makarooni. Cuntadii ayaan karsannay qaybsannayna maaddaama cuntadu ay gabaabsi naga ahayd.

Muddo ka dib waxa naloo soo diray saddex Cabdi Bile maadd-aama gaadhigii waynaa burburay. Soddon qof ayaa la saarayay gaadhi kasta. Gaadhiga marka aad fuusho, ee qofku dabada sidaa ula soo galo, xadhigbaa lagugu wareejinayaa waayo gawaadhidan niman maaandooriye qaata ayaa wada lama joojiyo haddaad ka dhacdo iyo haddii kale. Sidii xoolihii oo kale ayaa dadkii la iskugu xidhxidhay.

Ma-gafayaashii Liibiya

Gaadhigii ayaa aan fuullay anaga oo xidhxidhan. Ka dib markii aan soconnay maalin iyo habeen, waxa maalintii xigtay ay na keeneen meel buuralay ah. Soomaalidii iyo Suudaantii waa la isku keenay. Koox kastaa gaarkeeda ayay waxii ay cunto haysatay xaabo ku karsatay.

Halkan aan joognaa waa goobta dadka la isku dhaafsado oo ku taal Suudaan xadkeeda. Waa halka magafayaasha Suudaanta ahi ay tahriibayaasha sharcidarrada ah ugu wareejaaan magafayaasha Liibiyiinta.

Maalintii danbe ayaa waxa dhacday in biyo yar oo dadka ka dhexeeyay gawaadhida saaraa oo qolodaa Carabtu noo keeneen, in ay Suudaaniintii tidhaa kaligayo ayaa an qaadanaynaa. Iyagu waa konton oo way naga badan yihiin, safarkiina wuu adkaaday oo biyihii ayaa yaraaday. Dabadeedna waxay noqotay in Soomaalidii biyihii ku dhagto oo dagaal meeshii ka bilaabmo. Waxa ay noqotay in xaabadii iyo biro yaryar oo laga helay gawaadhida dabada la isku qabto Soomaalidii iyo Suudaantii. Dagaalkii ayaa bilawday. Dumarku dhagax ay tuuraan ma haysan oo meeshu waa saxare. Ciid inta ay saydhiyaan ayay qaylo [ku darayeen] "Ba' nay nimanka iska celiyaay. Galaay." Sababta loo dagaallamay waxa ay ahayd in la is difaaco oo biyaha qoladii adkaataa qaadato.

Dagaalkii ayaa six un u bilaabmay oo waa la is dhex galay, dhawr iyaga ka mid ahna waa la dhaawacay. Soomaalida dhaawaceedu wuu yaraa waayo Soomaalidu way mitidayeen inkasta oo ay naga

tiro badnaayeen. Dagaalku markii uu cabbaar socday ayaa niman wadaaddo ah oo Soomaali iyo Suudaan ah oo aan dagaalka ku jirin inta ay maryo cad iyo go'yaal cad oo ay wateen luleen iyag oo leh "dagaalka hala joojo".

Dagaalkii markii la joojiyay ayaa nimankii dadkii dhexgalay oo qolo kasta dhankeedii u wacdiyeen oo yidhaahdeen "waxa aynu nahay musaafiriin, waxay aynu ku suganahay xaalad adag, wax ma haysanno, waynu dayacanahay oo waynu dhimanaynaa, markaa yaynaan inagu danbi shaqaysan oo dad dhiigooda dusha iska saarin. Ilaahay ayaa og in aan noolaanayno iyo in aan dhimanayno. Shaydaanka ha la iska naaro." Wacdigii markii uu soo dhammaaday waxa lagu heshiiyay in la gar-naqsado. Xaggooda waxa ka soo tagay afar nin, xagayagana afar. Wareysi ayaa qolo walba [lala yeeshay ku saabsan] waxa ay tabanayso, dagaalku waxa uu ku yimid, biyihii iyo inta dad dhib qabta. Dabadeed waxa la yidhi maaddaama oo hadda aynaan xoolo haysan oo aan biyo kaliya haysanno, biyaha ha la kala qaybiyo. Caagadaha biyuhu waxa ay ahaayeen ilaa boqol midh. Laba qaybood ayaa loo kala qaybshay. Qof kasta oo dhaawacan, waxaa la siiyay laba xabbo oo magdhow ah oo looga jaray qoladii wax gaadhsiisay. Sidaa darteed kontonkoodii xabbo labo xabbo waxa looga soo jaray ninkii Soomaaliga ahaa ee dhaawacmay. Qoladii kalena waxa intii Soomaalida looga saaray lix xabbo oo saddexdii qof ee dhaawicii ee Suudaanta ahaa la siiyay. Dabadeedna waa la is gacan qaaday halkiina waa lagu heshiiyay.

Halkii waxa nalagaga qaaday Cabdibalayaashii Liibiyaanka. Hadda iyo waxa ka danbeeyay waxa maamulayay safarkayaga niman Liibiyaan ah. Liibiyaanku waa niman cadcad oo Talyaani u eg oo ka duwan Suudaantii Soomaalida u ekayd. Waa niman diinta wada caayaya oo waxay ka hadlayaan aanad garanayn, maafiya ah, xashiishad aad u cabbaya, oo seefo iyo biro sita.

Qolo kasta gaadhi ayaa la saaray. Annagu soddon baanu gaadhi ku raacnay. Soddonkaa waxa dumar ahaa sagaal, kow iyo labaatanna waa rag. Gaadhigu naguma fillayn. Gaadhiga marka dhinacyada

laga koro ee qof fuulo qofkii marka hore fuulay ayaa ka dhacayay waayo ma wada qaadayn dadka. Si aanay u kala daadan dadkii xadhig ayaa lagu xidhay maadaama ay tabcaameen safarkii badnaa iyo cunta la'aantii iyo sagaal cisho oo safar ah.

Markii aannu soconnay maalin kale ayaa meel nalagu yara hakiyay. Kadib waxa aannu dareennay in gaadhiga kani marba qolo qaadayo, soo dhaweynayo, haddana tagayo oo qolo kale oo saddex-aad soo dhaweynayo.

Socodkii Saxaraha dhexdiisa

Safarkii wuxa uu noqday safar rafaad badan. Marba meel ayaa aan ku hakanaynay. Markii aan safarkii ku jirno 17 ama 18 cisho gaadhigii na waday wuu xumaaday, Turayihiina baytarigii ayaa ka dhacay. Waxa ay nagu yidhaahdeen halkan ka lugeeya, oo waddadan qaada waxa ay idin gaynasaa meel foostooyin ay yaallaan maalin kadibna halkaas ayaan idinka qaadaynaa.

Waxa aan u haysannay meel dhaw in aan tagayno. Alaabtii iyo raashinkii iyo wixii aan sidannay way dhammaadeen. Biyo-biyo yarbaan sidannaa iyo waxoogaa timir ah oo soo hadhay. Lugbaa bilaabantay. Intii hore gaadhi ayaa nala saaray oo nalagu geeyay. Waxa aannu lug bilawnay goor maqrib ah. Tooshash yaryar oo waddada lagu ilaashanayo ayaa ay na siiyeen. Habeenkii oo dhan markii aan lugtii wadnay ayaa dadkii kala tageen. Waxa dib u hadhay dadkii tabarta darraa, dumarkii iyo kuwii da'da ahaa.

Waxaan ka mid ahaa dhallinyarada firfircoon oo xagga hore ku jirtay aniga iyo ninkii aan saaxiibada ahayn. Markii aan habeenkii oo dhan soconnay ayaa aannu is nidhi ha la isa sugo. Markii uu waagu soo dhawaa ayaa meel waddada ku dhaw aan iska jiif-jiifsannay. Dadkii marba qaybi sidii ay noo soo gaadhaysay habqankii waxay na soo wada gaadheen ilaa toddobadii aroornimo. Dadka waxa ka muuqday daal badan iyo diif.

Haddana mar labaad 11 aroornimo ayaa lugtii bilaabantay. Maal-intii oo dhammaystiran ayaa aannu lugaynaynay. Marba sidii la

isku sugayay, habeenkii kale ayaa aan lugaynaynay iyo maalintii ku xigtay kuwa socon kari waaya waa aannu ka tagaynay, haddana ku sugaynay si ay noo soo gaadhaan. Saddex cisho ka dib, markii aan waxyar soconnay waa aan joogsannay maxaa yeelay dadkii aad ayay u daaleen. Habeen iyo maalin ayaan socodkii hakinnay.

Wax la cuno waa la waayay. Dadkii markii cunnadii dhammaatay dagaal ayay isku wada bilaabeen inkasta oo ay tabar darro awgeed aanay muddo yar dagaal wadi karayn. Nin ayaa aniga ila faqay tahriibta galijiray oo wuxuu yidhi "waar heedhe, waxaad samaysaa timirta aynu cunayno lafaheeda jeebka inoogu shub. Anna basal ayaan inoo hayaa oo aynu cunaynaa." Timirtii markii ay dhammaatay waxa bilaabantay in aan lafihii muudmuudsanno oo iyada cunno ka dhiganno.

Kadib haddana lug ayaa bilaabantay. Lugtii markii aan laba cisho oo kale ku jirnay, ayaa oday naga dhintay. Waan xasuustaa dirqi ayuu ku socday marwalbana waa la sugayay. Dadka laftoodu qunyar ayay socdeen badhkoodna kolba wuu nasanayay. Si lama filaan ah ayuu odaygii tug-tug-tug inta uu yidhi hal mar dhacay. Waa an dul tagnay. Waa lagu soo ururay. "Waar maxaa odayga ku dhacay? Waannu eegnay. Mise nafiba kuma jirto.

Waxa uu ahaa qofkii ugu horreeyay ee naga dhintay. Dadkii waa ay wada naxeen oo argaggax ayaa ku dhacay. Qayb ayaa oyday, qaybina waxay tidhi halkan ayaan ku wada dhimanaynaa. Kadib waxa bilaabantay isaga sidii loo aasi lahaa in hawsheeda la galo. Dhawr nin ayaannu iskugu nimid oo aan itaalba ku jirin. Ciiddii saxaraha ayaa aannu u kala xaaqnay, ku ridnay, ku rognay, oo salaadna ku tukannay. Ma garanayo. Dadka naxdin, awood darro iyo dhibaato badan ayaa heshay.

Kadib markii aan cabbaar soconnay ayaa dadkii qofkastaa leeyahay "indhaha ayaa i madoobaanaya, malaha waan sii socdaa. Waan wareerayaa. Waan dhacayaa. Alla waar bal ha iga tagina". Dumarkii qayb ayaa lugayn kari waayay oo aan ka tagnay. Qofkasta oo lugayn

kari waayay waa laga tagay. Qayb waan jiidaynay, gabadh anaga nala socotay marba waa an jiidnaa oo waan kicinnaa aniga iyo inan kale.

Haddana markii aan cabbaar soconnay ayaa haddana gabadh reer Xamar ahi dhacday. Dabadeed waxa ay tidhi "bal ii kaalaya" Waan dul tagnay. Waxay tidhi "kollayba hadda geeri ka nixi mayno oo waynu wada dhimanaynaa. Waxa laga yaabaa in qof ama laba inaga hadho. Nimankuna been ayay inoo sheegayaan oo meel fog ayay inoo tilmaameen. Aniga lugtii way iga dhamaatay oo muddoba waan is dhibayay. Waan ogaa oo waan dhimanayaa. Ninkaygii ayaa iga soo tagay ani iyo afar carruur ah oo aan dhalnay si uu noogu soo shaqeeyo. Dabadeedna tahriibtan ayuu soo galay oo waddadaas dheer ayuu soo maray. Waxa la ii sheegay in meel la lugeeyo marmarka qaarkood oo saxaraha ku taalla in uu ku dhintay. Meeshiina waan joogaa. Ninkaygii halkan ayay naftu kaga baxday, anna halkan ayaan ogahay in aan ku dhimanayo oo la ii soo waday." Kadib, warqad yar iyo lacag yar oo ay ku sidatay guntiga ayay tidhi "lacag intaas ayaan wataa oo aan rabay in aan waddada ku maro. Waraaqdanna carruurtaydii teleefankoodii ayaa ku qoran. U sheega in ay hooyadood halkaa ay ku dhimatay. Lacagta tanna sidaad ugu gudbin kartaan ugu gudbiya. Haddii ay idinku baxdana waan idiin xalaaleeyay. Markaa dardaarankaa walaalooyaal ii fuliya".

Runtii waa aannu argagaxnay inskasta oo qofkii labaad ee naga dhinta ay ahayd. Markaa dadka qayb ayaa tidhi aynu ku khasabno gabadha tan oo aan jiidno oo yaanay sidan ku dhiman. Qaybna naxariistii way ka tagtay oo waxay leeyihiin waar niyohow gabadha tan waxba uma tari karno ee innaga mariya. Halkii ayay nagaga hadhay gabadhii.

Markii aannu muddo shan saacadood oo kale ah soconnay ayaa qolyo naga danbeeyay oo aayar soo socday gabadhii soo dul mareen iyada oo naf baxday. Waxa aan sii daalaadhacnaba haddana gabdho kale oo laba ah ayaa iyagana halkii aan tabar la'aan uga tagnay.

Waa maalintii shan iyo labaatanaad.

Muddo yar ayaan soconnay markii saaxiibkay isna sidii aan u

soconnay uu dhacay. Haddana waxa bilaabantay in dhammaantayo indhuhu na madoobaadaan dabadeedna aan wada daadanno.

Wadadii ayaa aannu wali haynay oo wax rajo oo kaleba ma lihin. Waxa nagu qufulnaa haddii aad socotaan wax yar ayaa idiin hadhay. Mid ka mid ah dhalinyarta oo waxa aan xasuustaa caagad yar oo uu sitay hadba la leexda. Ninkaasi firfircoonidiisa iyo socodkiisa ayaa aan ka yaabnay. Mar danbe ayaa waxa uu u sheegay gabadh ay wada socdeen in uu kaadidiisa cabbayo. Kuwa kale in ay ku daydeenna waan u malaynayaa. Annagu markaa basal ayaan cunaynaa, ani iyo niman kale oo saddex ah. Nin oday ah oo ah kii ii sheegay in aan lafaha timirta haysto ayaa wuxuu sitaa basal badan. Basashaas ayuu qof walba falidh yar siiyaa. Afar nin oo saaxiibbo ah oo isku dhaw baanu ahayn oo mid naga dhintay.

Laba cisho oo danbe ayaan soconnay. Dhibtii ayaa badatay. Qofka dhacana cidi ma gargaarayn, ka hadha ee socon kari waayana halkiisa ayaa lagaga tagayay. Wax naxariis ahina ma ay jirin. Yar reer Boorama ah ayaa aan aad uga naxnay. Waxa uu lahaa "waar meeshu waxba inooma jirtee i jiida walaalayaaloow, anigu socon kari waayaye. Waar ha iga tagine. Walaalayaal ha iga tagina. Walaal reer ayaan kaligay u socdaa oo aan u tahriibayaa. Walaalayaaloow cidla ha igaga tagine". Dhabtii la iskuma naxayn oo naxariisi way dhammaatay ilaa hadda siddeed ayaa naga dhimatay oo aan halkii kaga tagnay oo marba qof dhimanay oo aan dan laga lahayn. Waxaasi hawl dadka u taalaba ma ahayn.

Markii aan in yar soo dhaafnay halkii aan wiilka yar kaga tagnay, dhammaantayo socodkii ayaa naga dhammaaday. Indhihii ayaa na madoobaaday. Meel buur ah ayaan degnay si aan u dugsanno. Habeenimo ayay noqotay. Dabadeedna waxa aan ku qasbanaanay in aan dhulka qodano oo madaxana si aan ciiddu nooga galin go'yaal iskaga duubno. Gacmaha ayaan la soo baxnay. Si uu qabawga nooga celiyo faraha badan ee dhacaya dhulka ayaan isku aasnay wixii garabka ka hooseeya. Dabadeedna ciiddii ayaan isku

soo rognay sidii qof is xabaalaya oo kale. Waxa aan isku aasaynay bal in aan diirrimaad helno.

Aroortii waxoogaa tamar ah ayaa na gashay. Sidaa awgeed waa an lugaynay cabbaar kadibna socodkii ayaan kari waynay. Meel ayaannu iska jiifjiifsannay. Dadkii qofba meel ayuu ku dhacay. Markaa waxa ay noqotay in markii aan isku soo lugayn kari waynay aannu isku soo gurguuranno oo madaxa isa saarno si aan hadalka isku maqashiin karno una wada sheekaysan karno. Talo ayaa an is waydiinnay. Wiil yar ayaa yidhi "waar anigu talo garan maayee waxa aan ka naxsanahay halka aynu ku suganahay oo wax rajo ah aynaan nolosha ka qabin iyo aniga oo waliba aan ifka wax carruura ah kaga tagayn. Taas ayaa an anigu ka naxsanahay waayo haddaan carruur kaga tago ifka magacayga ayaa sii jiraya". Ku kale ayaa isna yidhi "waar ilma-adeerayaal waxaad iigu ducaysaan, in gabadhii aan soo mehersaday, markii aan soo tagayay uur ay lahayd in Ilaahay wiil ka dhigo si magacaygu muddo u sii jiro." Mid saddexaad ayaa yidhi "waar waxa aan ka naxsanahay dhimashadeennan maanta iyo cibaado la'aanta, dad iska soo haajiray oo aan diin u socon, oo wax kale u socon oo dhimanaya. Markaa Ilaahay bal in uu inoo sahlo aynu ka barino". Runtii qofba meel ayuu ku dhuftay. Anigu waxa aan aad uga xumaa waalidkii oo aan kala yar fognahay, waalidkii oo iga xun, waddadaa aan soo maray oo aanay ogayn maanta haddii aan dhinto, anigii oo aan waxba u qaban karin. Markii aan in door ah wax is weyweydiinnay oo mid ka mid ah nimankii dhallinyarta ahaa, kii ugu weynaa uu leeyahay "nabar ayaa i haya. Waxaan u malaynayaa inay iga baxayso ee bal ashahaada ii qabta oo aan quraan akhrinayno ayaa...

Qafaalashadii Saxaraha Dhexdiisa

...hal mar gaadhi ordaya oo xiimaya ayaan guuxiisa maqalnay. Guuxii ayaa soo dhawaaday oo agtayada yimid. Waan awoodi waynay in aan u kacno gaadhiga waayo tamartii ayaa dhammaatay. Niman yaacaya ayaan wajigooda xasuustaa. Nimankii Liibiyaanka

ahaa ee cadcaddaa. Mid kastaa waxa uu sidaa caag ay caano ku jiraan. Caanihii ayaa qof walba inta sufur loogu shubo afka looga shubayay si bal naftu u soo noqoto. Waa nala garbo-galayay si naloo soo fadhiisiyo. Waxa ay na waydiiyeen in dad kale jiraan. "Way jiraan" ayaan nidhi "ee bal waddada hore u socda". Qof kasta waxa loo keenay xabbad liin macaan ah, iyo waslad kaluun ah. Markii aannu intii yara cunnay ee qayb kalana caanaha lagu qulaamiyay, ayay dadkii soo niyaayireen oo naf soo wada gashay. Maalintii oo dhan halkii ayaa kolba wax yar nala siinayay. Habeenkiina halkii ayaa aannu u hoyonnay.

Aroortii danbe ayaa dadkii ay isku soo ururiyeen raggii oo ay dabadeed yidhaahdeen "annagu ma ihin nimankii idin kaxaynayay. Waxa aannu nahay niman idin caawinaya oo waxaan idin gaynanaa meesha la idinka qaadayo". Wali saxarihii ayaan ku jirnaa waana na la sii qaaday oo waxa nala geeyay meel biyo leh. Dadka dayac ayaa ka muuqda. Qalfoof ayay noqdeen hilibkii ka dhammaaday. Indhihu way na goteen. Waxa aad na mooddaa dad aan labaatan sano waxba cunin.

Halkii waxa aan joognay afar cisho oo aan wax cunaynay waxna cabbaynay. Inkasta oo tirada aannu markii hore gaadhiga ku saarnayn soddon meelahaa ahayd, nimankii waxa ay iskuu soo ursheen kaliya 22 qof maxaa yeelay waxa dhintay dhallinyaro badan oo aannu saaxiibbo ahayn. Waxa dhintay odayaal nala socday oo ah odaygii ugu weynaa iyo oday kale. Waxa dhintay gabdhihii saddex ka mid ah. Dadku haddana waxaas wali dan kama laha waayo waan rajo dhignay. Waxa aan aaminnay in aannaan meel tagayn oo noloshii waan ka quusannay.

Muddo yar ka dib gawaadhi kale ayaa noo timidday oo na qaadday. Markii aan Labo habeen oo kale safar ku sii jirnay ayaa la yidhi halkan ayaad joogaysaan labo ama saddex cisho oo danbe. Waxa nala siiyay cunto tayo xun.

Safarkayagii afartan cisho markii uu marayo, oo aan dayac iyo iskaga jirno safar adag, ayaa waxa maalintii danbe noo yimi rag

gawaadhi wata oo sheegay in magaaladii noo jirto 100 km oo aan u lugaynayno. Waxay yidhaahdeen "waxaad tagaysaan guri kharaabad ah. Gurigaas ayaa gawaadhidu idiinku imanaysaa oo aad ka raacaysaan".

Socodkii ayaan dib u bilawnay maadaama aannu tamar yeelannay cuntana sidanay. Sidii aannu isku dabajiitamaynay ayaa waxa naga hor yimid guri ood weyni ku wareegsan tahay. Markii aan gurigii inyar u soo jirnay ayay qaybtayo tidhi ina dhaafsha. Qaybna waxa ay tidhi maya e aynu eegno waa intaas oo aynu cunno ka hellaa e. Toddoba naga mid ah ayaa gurigii loo diray intii kale socodkii ayay iska si wateen.

Gurigii ayaan ku soo leexannay. Mise gurigu waa cidla. "Miin mawjuud (Yaa jooga)?" ayuu ku dhawaaqay wiil nala socday oo af-Carbeedka garanayay. Markii nalala hadli waayay ayaan hore u soconnay. Dabadeedna sanqadh ayaannu maqalnay guriga dhexdiisa. Waannu soo soconnay. Mise waaba cod dumar oo af-Soomaali ku leh "Walaalayaaloow soo socda". Hore ayaan u soo soconnay. Mise gabadh ayaa joogta dayac ka muuqdo oo silsiladaysan. Dabadeedna way oyday markii ay na aragtaay oo waxay tidhi "Walaalayaaloow soo fadhiista. Dad Soomaaliyeed baad tihiin. Muddo laba sano ah Soomaali maan arag. Waxa aan ahaa gabadh Soomaaliyeed oo tahriib soo gashay. Dayac badan ayaan soo maray. Markii aan Ajdaabiya[10] marayay ayaa nin Carab ahi i helay oo gaadhi yar wata. Kadib wuu i soo qaatay oo cunto ayuu u siiyay. Kadibna lugta ayuu iga xidhay, waxa aanu ii isticmaalaa sidii naagtiisa. Walaalayaalow cidlada ha igaga tagina".

Badankayaga arxan naguma jiro marka laga reebo inan naga mid ah oo gabadh ay aad isku jeclaayeen saxaraha nagaga dhimatay. Intayadii kale waxa aan nidhi waar gabadha tan yayna bad ina galin. Inankii ayaa noo sheegay in markii naftu ka baxday gabadhii ay is jeclaayeen in qolo ka danbaysay u timiday oo ay la aastay. Sidaas

10 Ajdaabiya waa magaalo ku taal Liibiya oo qiyaastii 150 km u jirta Banqaasi.

darteed wuu diiday in gabadha tan laga tago waxana u nagaga adkaystay in wax la taro.

Goorma ayuu ninku yimaaddaa ayaannu waydiinay. Waxa ay noo sheegtay in uu habeenkii yimaaddo. Waxa aannu go'aansanny in aannu gabadha badbaadinno isagana garaacno waayo marka uu faraxumaynayo silsilladda ayuu ka furaa. Waxa kale oo ay noo sheegtay in uu yahay nin aad u taxadar badan, qori haysta oo laga yaabo in uu xataa raadka eego. Ka dib waxa aannu ku nidhi halkaaga iska fadhi. Gudahaannu galaynay, mid naga mid ahna waxa aan ku nidhi raadkii soo eeg-eeg oo tirtir. Qofba meel ayuu galay. Qaar ayaa u baxay gurada aqalka, qaybna sariirta ayay hoosteeda gashay, halka qayba meelo kale u gashay. Ulo yaryar iyo budhadh ayaan diyaarsannay.

Saacad iyo badh ka dib, waxa aannu maqalnay guux gaadhi. Gaadhi yar ayuu ahaa. Gaadhigii ayuu soo dhigtay. Waxa aan ka eegayay meel daloosha. Waxa uu soo dagay isaga oo bac weyn sita. Quruxda ka muuqata marka aad aragto nin weyn oo masuul ah ayaad moodaysaa. Isla markii uu gudaha soo galayba dhunkasho ayuu gabadhii ku bilaabay.

Hore waxa aannu ugu balannay in kan noogu xoogga wayn gabadha agteeda u galo gacanta ugu horraysana isagu ku dhufto. Kii ayaa soo talaabsaday oo cunaha qabtay. Ninkii ayaa iska tuuray. Todobadii aannu ahaynba waanu ku ururnay sidii aannu u garaacaynayna dhulka ayaannu ugu ridnay. Wali isaga oo naftu ku jirto, ayaa uu kii af-carbeedka yaqaannay waydiiyay furahii silsiladda. Silsiladii ayaannu ka furnay. Markii aannu silsiladdi ka furnay ayaa ay tidhi i suga inyar. Illayn waxa ay kala baratay dhulkii uu lacagta dhigan jiray. Waxa ay soo qaadatay lacag ilaa 2,000 oo dollar ah. Annaga ayay noqotay, waxa aannu qaadannay jaakado, annaga oo argagaxanna meeshii iskaga yaacnay.

Qoladii kale ayaa aannu soo gaadhnay. Waxa ay nooga soo horreeyeen gurigii nalagu ballamiyay ee kharaabadda ahaa oo aan habeenkii u hoyannay. Qoladii kale ayaa aannu uga warranay

gabadha aan soo badbaadinnay. Gabadhu halkan ayay ku faraxsantahay. Qof walba waa ay dhunkanaysaa oo ay leedahay "Alla walaal abaal ayaad ii gasheen".

Goortii la gaadhay habeenkii labaad ayaa ay noo yimaaddeen nimankii Liibiyaanka ahaa ee magaalada nagayn lahaa. Waxa ay wataan laba xaajiyadood oo yaryar. Xaajiyadihii ayay xagga danbe na saareen. Gaadhiga dushiisa ayay na jiifsheen, iskaaya dul saareen oo madaxa nagaga istaageen si ay noo leekaysiiyaan meesha. Markii aannu is dul jiifjiifsannay, shiraac ayay nagu giijiyeen si aan bilaysku noo arag.

Markii ay gaadhiga dhaqaanjeenba, naqaskii ayaa dadka ku dhagay. Gabadhna waabay suuxday. Dumarkii waxa ay bilaabeen in ay dadkii kale cidiyaha ku rifaan maadaama naftu hayso. Anigu waxa aan haystay daasad yar oo kalluun ah. Waxa aan ka fujiyey furkii sare. Shiraacii ayaan dalooshaday in yar oo sankayga iyo afkayga leeg. Halkii aniga oo hawo ka qaadanaya, ayaa kii ugu xigay meeshii iga riixday oo ku dhagay. Sidii dillaacii la isugu dhaafdhaafayay wuu waynaaday, mise bannaan ayaa an u soo baxnay dhammaantayo.

Dadkan waxa shiraaca loo saaray oo la isku dul saarsaaray si aanu bilaysku u arag. Haddana waaba annaga oo magaalada bilaa shiraac iska marayna.

Qof kastaa wuu arkayay dadkan Afrikaanka ah ee madmadow ee gaadhiga socda dusha ka saaran. Saddex gaadhi oo bilays ah ayaa na arkay oo caydhsaday labadayadii xaajiyadood. Nimankii nawaday waxa ay garawsadeen in qorshahiii fashilmay gaadhigiina xoog ayay u kaxeeyeen. Waxa bilaabmay isbaacsi gawaadhi.

Waaba haddana gawaadhidii booliska oo nagu dhinac jira. Markaa ayuu dirawalkii gaadhigayagu hal mar haanbiriigga jiiday, biriigana qabtay. Ka dib hal mar ayuu gaadhigii sida wadhafka isku wareejay. Gawaadhidii bilayskuna way na dhaafeen. Waxii aan filimaanta ka daawan jiray wax la mid ah ayaan meesha ku arakay. Afar ka mid ah dadkii halkii ayay ku daateen wareeggi gaadhiga dartii.

Intayadii kale gaadhiiga ayaan jambiga qabsannay. Dirawalkii xoog ayuu haddana u kaxeeyay. Waxba kama galin cidda dhacday iyo gaadhiga midna maxaa yeelay waxa uu ka cabsanayay in bilaysku qabto. Dhawr sakadood ayuu ka wareegay, cid ayuu la hadlay, waxa aanu galay meel oodan oo albaab wayn leh. Guri ayaan nala geeyay. Haddaan sidaa u gallay gurigii, rag ulo wata ayaa garaac nagu bilaabay iyaga oo nagu haysta dhaawaca gaadhiga soo gaadhay. Ka dib qol yar oo mugdi ah aya nalagu xereeyay.

La-haystahii Ajdaabiya

Aroortii markii ay tahay, bas yar ayaa nala soo saaray. Guri kale ayaa nala geeyay oo Soomaali kale joogto. Qol gooni ah ayaa nala geeyay cunnana waa nala siiyay. Guriga niman ayaa ilaalinaya oo meesha lagama baxsan karo. Intaa waxa dheer dayr wayn ayaa uu gurigu leeyahay. Waxa aan dareennay in nimankii magafayaasha la odhan jiray in aanu u soo galnay.

Wax yar ka dib waxa noo yimid nin waxa uuna yidhi "Soomaaliyeey waxa aad naga soo khasaariseen lacag badan. Saxaraha ayaannu idinka soo qaadnay. Naftiinna ayaa aan badbaadinnay. Dad dhib badan ayaad tihiin haddaad tihiin Soomaali. Shiraac baa la idinku xidhay. Anaga waad na xidhi gaadheen. Dadkii lacagta aannu rabnay in aannu ka qaadno, oo afar qof ah ayaad khasaariseen oo meeshii ka maqan. Qof kasta markii hore waxa laga qaadi lahaa 1000 doolar, laakiin hadda qof kasta waxa laga qaadayaa 1400 oo doolar." Ninbka nala hadlayay waxa uu ahaa nin si wanaagsan u labisan oo uu la socdo tarjumaan Soomaali ahi.

Runtii way nagu adkaatay waayo kharash waxii aannu haysannay wuu naga soo dhammaaday marka laga reebo dad tiro ah oo lacago yaryar haystay. Hadda tiradayadu waa 20 qof. Markii nimankii naga baxeen waxa aannu iswaydiinay lacag in la heli karo. Sababo kala duwan awgeed dhammaan dadkii waxa ay yidhaahdeen ma bixin karno. Sidaa awgeed waxa aan isku raacnay in aan diidno oo ku nidhaa lacag ma haysanno waxii ka yimaadana dusha u ridano.

Wax yar ka dib, labadii nin ayaa noo yimid. Waxaan u sheegnay in aannaan haysan lacag bixinna doonin. Isla markii waxaa noo soo galay 8 nin oo qaybi jeedallo sitaan, qaybi seefo sitaan, qaybina budhadh sitaan oo cirka maraya oo sakhraansan. Waxa ay ka cadhaysnaayeen lacagta aan diidnay in aan bixinno iyo khasaarahii aan u gaysanay. Nimankani intaa diinta iyo Ilaahay ayay caayayaan. Dhalooyin khamri ah ayay sitaan. Dhalooyinka ayay madaxa nagaga garaacayaan. Budh iyo jeedalna way noogu dareen. Gabadh uur lahayd ayay damceen in ay uurka ka laadaan markaasay dhabarka iskaga dhigtay. Inkasta oo ay si bilaa naxariis ah noo garaaceen haddana waan diidnay in aan lacagtii ay codsadeen bixinnno waayo ma aannan haysan. Ka dib waxa ay yidhaahdeen, "u kaadiya u kaadiya, runtii meesha tan aad joogtaan garan maysaan! Liibiya ayaa la yidhaa. Liibiyana anagaa adeer leh. Reer Liibiya ayaannu nahay. Diinna ma lihin. Ilaahna ma naqaan. Waxa aannu naqaanno ma jiraan. Lacag baannu annagu caabudnaa. Lacag baannu u baahannahay. Tusaale ayaannu idin siinaynaa. Tusaalahaasi hadduu idin anfici waayana, annagu maalin wax ka badan lacag dadka ma waydiinno. Maalinta labaadna waa inta la soo xawilayo. Sidaasi ayuu dadka wakhtigu kaga dhacaa. Waqti ayaa nagu socda. Dad kale ayaannu keensanaynaa oo na sugaya. Idinkana anagaa idin naqaan. Inaydaan waxba ahayn oo aad adhi tihiin ayaannu idin tusaynaa".

Ka dib way na fadhiisiyeen. Qaybtayo markay garaaceen, ayaa waxa ay yidhaahdeen, "dadka lacagta bixin waayey ee idinka soo horeeyay, ayaa aan kuwa aan lacagta ka filayno tusaale ku siinnaa".

Wiil dhalinyar ah oo Soomaali ah oo quruxda ka muuqata aad yaabaysid ayay qol kale ka soo kaxeeyeen oo miis wayn dushiisa jiifiyeen. Afar nin oo xoog badan ayaa labada lugood iyo labada gacmood qabatay ruuggaga iyo gamcahana ka garaacday ilaa uu dabcay. Kadib waxa la soo qaaday dubbe iyo masaabiir oo calaacalaha iyo la isku musbaaray miiskii. Waad yaabaysay qaylada ka yeedhaysay iyo oohinta. Dadkii gabi way miyir badalmeen. Waxa aan u qaban karnaa ma jirin. Qofkii is yidhaahda dhaqaaq, seef baa

qoorta kor taal. Wiilkii oo miiskii ku musbaaran ayay dabadeed isku qaateen. Ma ogin meel ay la aadeen iyo inay qawraceen toona. Haddana qayb naga mid ah inta ay qabteen ayay ugu hanjabeen, "kuwan sidaas ayaan u galaynaa berrito waqtigan lacagta haddi la idinka waayo. Taas uurka lehna, iyada iyo ilmaheeda waanu isku musbaaraynaa intiina kalena boqol doolar baad ku daraysaan lacagta. Haddii aad berrito bixin waydaan oo ay sahandambe u dhacdana, laba kun oo doolar ayaad bixinaysaan".

Argagax ayaa noo dhammaday wax aannu samaynona waannu garan waynay.

Waxa ay noo keeneen taleefan aan Soomaaliya kula soo hadalno oo saf ayaan u gallay. Qof kasta waxa ay noqotay in meeshii uu lacag ka helayay uu la hadlo. Qof dibad ku xidhan oo cidi u joogto iyo qof dalka loo joogaba. Waxa iigu layaabka badnayd waxa kamid ahaa oday wayn oo isaguna nala joogay oo reer Xamar ahaa ayaa waxa uu rabay in uu waydiisto xaafaddiisii lacag markaa ayaa waxa u leeyahay isaga oo wiil uu dhalay la hadlaya "aabbo, ma i maqashaa? Aabow adowgaa saw garan maysid? Aaboow waa la i haystaa. Madax furasho ayaa la ii haystaa. 1500 doolar oo lacag ah baa la ii haystaa. Jagadii halkaa ku taalay iyo afartii neef ee reer hebel inoo hayeen, intaba doon. Aaboow berrito see uga gaadhsiin kartaa?". Oohinta odaygaa ka dhacaysay waad yaabaysaa.

Dadka qof walba, hooyo noqotayaa, aabbe noqotayaa, adhigii ii soo iibsha yidhiyaa, cid ayuu la hadlay. Runtii waad naxaysaa. Dadka qaybtood maba lahayn cid ay la hadlaan oo waxa ay isku qoondeeyeen in ay noqdaan adeegayaal ama kuwa tusaalaha laga dhigayo ee masaabiirta lala dhacayo. Waxaa nagu jiray wiil reer Xamar ahaa waxa uu la hadlay odaygii na soo diray ee mukhalaska ahaa ee Khartuum joogay (Axmed ee Soomaaliga ahaa) wuxuuna ku yidhi "waxa lanagu haystaa Ajdabiya. Tusaale ayaa nala siiyay sida laga yeelayo cidda bixin wayda lacagta. Ragga midka mid ah waxa la yidhaa Cali baaba. Arxan Soomaalida nagama dhaxayso ayuu yidhi. Markaa arrintaa side ayaad wax uga qaban kartaa?."

Axmed waxa uu ugu jawaabay in uu isagu dadka u soo diro Liibiya aanay isaga iyo Liibyaanka ka dhaxayso wada shaqayn. Waxa uu kale uu yidhi anaa ku odhan lacagta ka dhin oo ka dhig 1000 doolar haddii kale dadka aan soo dirayo waxa aan u leexin *Kufra* oo ah magaalo kale oo ku taalla Liibiya. Dabadeed waxa uu naga codsaday in aan telefoonka ugu dhiibno Cabdul si ay u wada xaajoodaan. Muddo yar ka dib Cabdul ayaa garaacay. Axmed ayaa u sheegay in uu dadka marin doono dariiq kale haddii aanu ula dhaqmin si wanagsan. Waxa uu ku yidhi dadka kan qayb aannu ehel nahay ayaa ku jira. Waxa kale oo uu ugu hanjabay in uu dadka ku celin doono Soomaaliya haddii aan lacagta laga yarayn oo aan laga dhigin 1000 doolar sidoo kalena aan laga dhaafin kuwa awoodi waayay

Markan inkasta oo aan reerkayagii kala irdhawnay haddana waan la hadlay. Waa laguu soo diraya oo lacag baa laguu raadinayaa ayaa la i yidhi. Rajo waan qabay laakiin waxa aan jeclaa dadka kan bilaashka ku baxaya in Ilaahay iga dhigo.

Nasiib wanaag, gabadhii aan meesha ka soo furannay ayaa abaal gud ahaan ka bixisay lacagtii saddex naga mid ah oo aan ku jiro. Wadahal ka dibna, waxa aan bixinnay lacagtii Axmed ku taliyay. Qofkii helayayna wuu baxshay qofkii kalena waa laga dhaafay.

Waxa nala joogay yar Carabiga aad u yaqaanna. Waxa ay na waydiiyeen markii aan wada hadalka bilawnay in uu jiro cid Carabiga taqaannaa inuu nagu jiro. Bilawgii waa aan diidnay maxaa yeelay waxa aan ogaannay in ciddii Carabiga ku hadasha qol gaar ah lagu hayo loona addeegsado turjumaanimo ama af-celinta.

Annaga oo wali gurigii ku jirra ayaa kii Carabiga yaqaanay waxa uu maqlay isaga oo kii magafihii uu kala hadlayo magafayaal kale oo saaxiibadiis ah oo Banqaasi jooga in ay na qafaashaan marka uu isagu na sii daayo oo uu leeyahay "nimankii Soomaalida ahaa ee aan soo kaxeeyay markan, waxa ay la hadleen Axmedkii Khardduum joogay. Waxa ayna u sheegeen waxii aan ku samaynay. Midda kale lacag kama wada hayo oo lacagtii ma dhammaystirna. Markaa

waxa aan keenayaa meel Banqaasi u dhaw. Ugu immo halkaa oo xoog ku kaxayso. Halkaa saacad ayaan ku hakinayaa. Marka aad timaaddo ulee gawaadhidana ku guro. U kaxayso dhulkaagii qof walbana 2000 doolar oo kale ka qaad. Wixii lacag bixin waayana aydaada sii, koronto ku qabo oo cadaab. Nacdal baa ku taala kuwan Soomaalida ah. Annagana way na ceebeeyeen waana kuwo wasakh ah ee laa."

Socdaalkii Tiriboli

Waxa ay nagu kala qaybiyeen laba gaadhi oo yaryar oo noo qaaday Ajdabiya oo ah goobtii ay labada nin ku heshiiyeen. Kadib markii aannu goobtii gaadhnay ayaa waxa ay noo sheegeen in aannu waxogaa nasano iyaguna ay shidaal u doonayaan magaalada. Sikastaba ha ahaate, waxa aan garawsannay in aanay magaalada shidaal u doonan balse ay dib ugu laabteen goobti aanu ka nimid. Sidaa daraaded waxa aannu ka fikirnay sidii aannu meeshan uuga tagi lahayn. Waxa aannu isku raacnay in aannu yaacno. Waxa aannu u cararnay xagga buuraha si aan uga fogaanno magaalada. Gawaadhidii ayaa timid kadib wakhtiyar markii aannu sii maqnayn. Waxa ay bilaabeen in ay nagu raadshaan iftiinka gawaadhida. Waxa aannu ku sigannay in ay na helaan. Goobta aannu ku sugnayn ayaa waxa ay lahayd waxooga dhir ah oo noo suurto galisay in aan isku qarinno annaga oo beerka dhulka ku haynay. Kadib markii raggii magaaladii ku laabteen waxa aan hore u sii gallay buurahii.

Ma aannaan garanaynin jihada ay magaaladu naga xigto. Waxaa nala gudboonatay in aan yaacno habeenkii oodhan si aannu uuga fakanno labada kun ee dollaar iyo korantadii laysku qabanayay. Habeenkii oodhan waxa aan dhex wareegaynayn buuraha. Kadib waxa aan seexannay buur udhaw magaalada halkaas oo aannu ka toosnay goor ku dhaw 10 subaxnimo. Kadib waxaan bilawnay in aan cunno iyo xog magaalada ku saabsan raadsanno. Annaga oo halkii raadin ku jirna ayaa waxa noo bildhaamay biro dhaadheer. Waxa aan u dhaqaaqnay xagii birihu nooga muuqdeen. Waxa aan

ogaannay in ay tahay warshad sibidhka samaysa. Shaqaale ayaa joogay warshadda ubadnaa dad masaari ah.

Wiilkii dhallinyarta ahaa ee af-Carabiga yaqaannay ayaa u sheegay cidda aannu nahay. Waxa aanu ka codsaday in ay noo sheegaan sida ugu habboon ee aan ku tagi karno magaalada iyo halka laga raaco baska tagaya caasimadda Tiriboli. Waxa ay nasiiyeen waxooga roodhi ah iyo khudaar aannu cunno. Waxa kale oo ay na waydiiyen inta qof ee aan ahayn oo waxa ay na siiyeen cunno aannu u gayno intii kale ee nala socotay. Waxa ay noo sheegeen in aannaan socon dharaarti. Waxay noo tilmaameen saddex jiho, iyagoo yidhi jihadaa waxaa idinka xiga magaalo yar, takale tuulo yar oo ay joogan mukhalasiin, ta saddexaadna waxaa ku yaal xabsi.

Waxay noo sheegeen in aan ammaan nahay haddii aan gaadhno magaalada. Waxaa noo suurtogalaysa in aan helno bas oo aan la xidhiidhi karno qoysaskayagii. Waxa ay kale oo ay noo sheegeen in aan basaska u raacno laba-laba ama saddex-saddex. Waxa ay noo sheegeen in dadka magaladu ay yahiin dad fiican lakiin haddii aannu marno jihada qaldan in aannu gali goobta magafayaasha oo na ciqaabi nana waydiin doona lacag madax furasha ah oo badan, ama aannu ku bixi xabsiga, halkaas oo aannu ku jiri karno sannado dheer ama aan ku dhex dhiman doonno. Sidaa daraadeed, waa inaan u soconaa toos.

Waxa aan dib ugu laabannay dadkii kale annaga oo sidanna cunto waxa aanannu uga warranay qorshahii lagu tagayay magaalada.

Dadku waxa ay siteen kaliya lacag doolar ah oo lagu sarifikaro xawaaladaha Soomaalidu leeyihiin. Waxa aan is waydiinay haddii uu jiro qof haysto lacagta Liibiya. Gabadhii aannu soo badbaadinay ee meesha ku xidhnayd ayaa waxa ay haysatay waxooga lacag ah. Qofwalba waxa ay siisay 100 diinaar. Waxa aannu u malaynay in gabadhii aannu soo furanay ay ahayd shimbir Ilaahay noo soo diray oo naga furatay lacag la'aantii nala soo gudboonatay. Habeenkii waa aannu seexannay waxa aanannu baxnay shantii aroornimo annaga oo magaalada u galayna laba- laba iyo saddex- saddex.

Anigu waxa aan la socday saxiibkay iyo ruux haween ah. Waxa aan soo gaadhnay goobtii suuqa ahayd oo waxa aannu ka raacnay bas. Baska waxaa ka buuxay dad Liibiyaan ah. Uskag badan ayaa naga muuqday maadaama waxtiga dheer ee aan saxaraha ku soo jirnay aan jidhkayaga biyo taaban. Waxaa naga muuqatay diif badan oo caato ayaannu wada ahayn waxaana naga soo baxaysay ur aan wanagsanayn. Waxa aan gashanayn dharkayagii jeexjeexnaa oo waxa aan u muuqannay dad dawarsato ah. Markii aan baska soo fuullay, dadkii ayaa sanka naga qabsaday. Kuraasta baska laba laba ayaa loogu fadhiisanayay. Waxaa nalagu qasbay in aan bixinno lacagta kuraasta madhan maxaa yeelay qofna ma rabin in Afrikaankan uraya ag fadhiisto. Waan bixin lahayn baska dhan lacagtiisa haddii aan haysanno lacag. Hayeeshee waxa aannu bixinnay kuraastii madhnayd lacagtoodii.

Waxa aannu soconnay in ku dhaw toddoba illaa siddeed saacadood. Ugu danbayntiina waxa aannu gaadhnay Tiriboli oo aan ka raacnay tagsi na geeyay safaaradda Soomaalida. Safaaraddu waa mid baaxad wayn oo kumanaan Soomaali ahi joogto. Safaaradda waxaa ku yaallay xafiis xawaaladeed iyo maqaaxi. Sidoo kale waxa ay lahayd goobo dadka cunno laga siiyo.

Tiriboli

Markii aan gaadhnay Tiriboli ee aan anargnay dad badan oo Soomaali ah ayay laydh qaboobi na gashay oo aan nafisnay. Waa annu faraxnay naftiina nagu soo noqotay. Dadka ayaa waxa ay nawaydiiyeen intii qof ee nagaga dhimatay safarkii saxaaraha tiradooda iyo qabiilkii ay u badnayeen. Qofkasta waxa uu rabay in uu ogaado in ay ku jireen cid qaraabadooda ah inta dhimatay. Markii aan cunno iibsannay ee an cunnay ayaa Soomaalida lashaqaysata mukhalasiinta oo diyaariya dadka u baxaya safarka badda ee lagaga gudbaayo badwaynta Midhatareniyanka noo timid. Waxa ayna waydiiyeen meesha aan ka nimid. Waxay naga dhaadhiciyeen in aan iyaga raacno iyaga oo noo sheegay in ay iyaguna sidoo kale ka

yimaaden Waqooyiga [Soomaliland] oo ay na gayn doonan meel aannu dagno.

Nin ayaa na geeyay guri. Si aan dadka nalooga garan waxa aannu iibsannay dhar. Dhibaatada ka jirtay Tiriboli ayaa ahayd in haddii lagu arko adiga oo bas la socda magaalada dhexdeeda in xabsiga laguu taxaabayo halkaasna lagugu ilaawayo. Waxa kale oo nalagu wargaliyay in dadka Libiyaanka ahi ay aad u necebyahiin dadka madmadaw jidh dilaan amaba qudha ka jaraan. Sidaa daraadeedna aan guryaha ku jirno.

Gurigii marki aan tagnay, ninkii waxa uu na waydiiyay in aannu ka gudbayno badda, isaga oo noo sheegay in uu noo diyaarinayo doonta. Waxa aan u sheegnay in aannaan wax lacag ah haysan markaa laakiin aannu sugayno. Kadib markii aanu tagnay safaaradda laba maalmood oo isku xiga, waxa aan ogaannay in dadkii kale ee aannu isla soconay soo gaadheen magaalada loona kaxeeyay guryo ay degaan. Waan isku soo wada noqonnay marlabaad. Siddeed iyo toban aan ahayn waxa aan go'aansannay in aan wada degno guri kali ah.

Waa aannu faraxsannahay waayo waxa aannu is leenahay waa tahriibka halkii uu ku dhammanayay. Balse, xaqiiqdii kawna ma annaan joogin.

Ka- gudubkii Badda

Dhawr maalmood kadib, dadkii waxa ay heleen lacago ay u soo direen qaraabadoodi 14 naga mid ahina waxa ay cagta saareen safarkii badda.

Saddex doonyood ayaa markiiba la sheegay in ay badda ku dhex lunsanyahiin. Doonta la soo badbaadiyay ayaa ahayd mid naqas laga buuxshay oo loogu tala galay in ay qaado 30 qof balse la saaray 70 qof. May sii socon wax badan markii ay makiinaddu ka kharaabtay awoodna u yeelan wayday in ay dhex mushaaxdo hirarka badda ee kacsan.

Dhammaan sadexdii doonyood way xumaadeen. Mid kamid

ahi way dalooshantay, midina dagtay, halka tii saddexaadna ay soo badbaadiyeen ciidamada ilaalada badda Liibiya oo dadkii soo badbaadayna u taxaabay jeelka. Kooxdayadii todoba kamid ah ayaa ku jiray kuwa xabsiga loo taxaabay halka todoba kalana ka mid ahaayeen kuwa degay. Naxdin iyo qaadan waa ayay nagu noqotay kadib markii aan maqalnay toddobada qof ee dhintay. Waxa ay aminsanaayeen in gaadhitaanka Tiriboli ay tahay halkii tahriibku ku dhammaanayay.

Wax kasta oo dhacay kadib dhawr ayaamood markii aan halkii sii joognay ayaa waxa naloo diyaariyay safarkii badda mar labaad. Waxa aan ahayn tiro ku dhaw 60 qof oo ay 11 annaga ahayd. Waxaa nalagu hayay guri kadibna waxa nalagu raray gaadhi iyada oo nalagu dhex qariyay qashin si aanan u aqoonsan goobta aan marayno haddii qorshahani fashilmo. Gaadhigii ayaa cabbaar na wareejiyay si aanan u aqoonsan meesha aannu joognay. Ugu danbayntii waxa aan galnay dayr dhisme laba dabaq ah oo wayni kuyaalo. Waxaa naloo waday xaga sare ee aqalka waxayna noo sheegen in aan halkaas joogno. Dabaqa hoose waxaa ka buuxay mukhalasiin. Waxay noo sheegen in aanu joogno meel layidhaahdo Suwara,[11] oo ayna ahayn sida farasmagalaha Tiriboli oo kale. Waxay nagu amreen in aannaan dibadda u bixin ilaa inta doontu diyaar noqonayso, iyagoo noogu daray in ragga ilaalada magalaada ka shaqeeyaa ay na xidhi doonaan oo aanay jirin cid naga horjoogsanaysaa.

Mid kamid ah mukhalasiinta ayaa lacagtii naga ururiyay. Qofkasta waxa uu ka qaaday lacag dhan 1000 dollarka maraykanka ah. Waxa uu ahaa Soomaali lacagtana waxa uu ugaynayay carabta. Carabku kaliya waxa uu yimaaddaa marka dadka doonta la saaro. Waxa uu lahaa gaadhi uu ku dhex wareego xaafadda inta uu sugayo. Kadibna waxa uu heshiiska la dhammaystiri jiray mukhalasiinta carabta ah. Sidan ayay kuwada shaqaystaan maxaa yeelay midna midka kale

11 Suwara waa magaalo dekadeed ku taal Liibiya oo qiyaastii 100 km galbeed kaga beegan Tiriboli.

kuma uu kalsoonayn. Wax lacag ah ma siiyo kahor inta dadka doonta lawada saarayo. Waxa uu ka taxadirayay in ay xabsiga u taxaaban ama ay diidan in ay qaybtiisa siiyan.

Qolka ayaan ku jirnay in kabadan 12 maalmood, rag iyo dumarba. Cunno ayay noo keeni jireen iyaga oo noo sheegay inay baddu kacsantantay oo aan la socon karin wakhtigan oo kale. Qolkaa ayaan wadda seexanaynay. Dummarku way la qabsadeen noloshan. Waxa ay noqdeen rag oo kale oo xataa aan maryaha iska badalayn. Waxaad arkaysay gabadh dhinac huruda saddex ama afar rag ah. Ma jirin wax dareen ah oo ragnimo ama dumarnimo ah. Waxa kali ah ee annaan wadaagayn waxa ay ahayd musqusha.

Kadib marka aannu laba iyo toban cisho ku jirnay xaaladdii ayaannu u adkaysan waynay. Kadib waxa aan waydiinnay ninkii dillaalka ahaa in ay noo wareejiyaan goob kale oo ka habboon. Waxa uu noo sheegay in dadkii kale ee annaga naga soo horreeyay ay halkan joogeen inka badan bil. Halkii ayaanan sii joognay 7 maalmood oo kale.

Maalintii sagaal iyo tobnaad ayay noo yimaaddeen abbaara saddexdii iyo badhkii subax nimo. Waxa ayna nagu gureen gaadhi noo qaaday xaggaa iyo buur u dhawayd badda. Kadib markii aan gaadhnay goobtii, waxa ay keeneen doon kala furfuran. Waxa ay isku xidhxidheen doontii. U qaadanwaa iyo layaab ayay nagu noqotay in aannu aragno doonti aan filaynay inaan kaga gudubno badda in hortayada lagu sameeyo. Hawa ayay ku buufiyeen iyagoo isticmaalaya bam yar.

Dabadeed markii la buufiyay mise waaba doontii yarayd oo dhinac 4 mitir ah, dhinaca kalana 6 mitir oo lagu qaadayo lixdanka aan ahayn. Doontii buufimada ahayd iyo mashiinkii ayaa aan xagga badda u qaadnay. Ka dib dadkii ayaa lagu raseeyay iyada oo qaar xagga hore la fadhiisiyay, qaar xagga danbe, qaar kalena dhinacyada.

Mid naga mid ah ayay u xilsaareen in uu doonta kaxeeyo maadaama u sheegay in uu yaqaan sida loo wado doonta. Waxa loo dhiibay telefoon dayax-gacmeedka ku xidhan. Waxa ay nasiyeen

timir, iyo qasaacado kalluun ah iyo walxo kale. Waxa aannu dhaqaaqnay 4.30 subaxnimo. Waxaa layaab nagu noqotay sida doonto dadka ula ciirciirayso. Xaddiga culayska saaran doontii awgii makiinaddii doonta waxa ay la daalaa dhacaysay in ay iska caabido hirarka badda. Waxa aan badda ku jirnay ku dhawaad 11 saacadood, markii hal mar matoorkii doontii ka go'ay oo badda ku dhacay doontiina istaagtay. Dabadeedna waxa ay noqotay in doontii ay sabbayso. Saddex cisho ayaan ku jirnay badda oo aan baaxaa degaynay. Dhibaato badan ayaa na soo waajahaday. Biyaha badda ayaa jidhka nagaga dhacaayay oo gubayay diirka sare ee jidhka. Cuntadii ayaa naga go'day dadkuna waxay ku sigtee in ay iyagu is cunaan. Wakhti ka mid ah saddexdii cisho, mid kamid ah dadkii doonta saarnaa ayaa waxaa madax martay xaaladdii adkayd iyo dhibaatadii ka soo martay xabsiga Liibiya. Anaka oo ku sugan badda dhexdeeda ayaa hal mar inta uu kacay yidhi "maxaad noo dhaafinaysaan? Waynu joognaa Laanbeduusa. Maxaad inoo dhaafinaysaan. Ha i dhaafin. Anuu dabaqan dheerbaaban ku dagayaaye". Kadibna waxa uu isku tuuray biyihii badda.

Maalintii saddexaad ayaa waxa na soo garab maray markab weyn. Waxa aannu u haadinnay maryaha una qaylinaay. Dabadeed wuu nagu soo leexday. Waxa ay arkeen in aannu nahay dad go'doonsan. Waxay dib noogu soo jiideen magaaladii waxaana naloo taxaabay xabsiga. Illayn waxa uu ahaa markab ay lahaayen ciidamada badda Liibiya.

Jeelkii Liibiya

Isla markii jeelka lana keenay, waxa la bilaabay in lana ciqaabo iyada oo lanagu eedaynayo in aannu nahay Soomaali tahriibayaal ah. Aragagax ayay nagu noqotay markii aan aragnay dadkii ku jiray xabsiga. Waxa aan la kulannay Soomaali ku jiray jeelka afar ilaa shan sano. Qaar ayaa lugaha ka curyaamay oo gurguuranaya. Waxaa layaab kugu noqon lahayd marka aad aragto dadka finanka iyo xasaasiyadda, qudhunka iyo dheecaanka ka dareeraya. Qaar kood ayaa u

ekaa reer akhiraad. Markii aan waydiinnay waxa sidan u galay, waxa ay noo sheegeen in subax kasta maxaabista la qaraaco seddex saacadood. Waxa kale oo ay noo sheegeen in askarta ilaalada ahi ay biyaha lacabayo ku daraan dawo taas oo sababta in jidhku cuncuno oo kadib ay ka soo baxaan finan. Nadaafad xumada xabsiga ka jirta daraadeed, injir ayaa qaybkasta oo jidhka ah kaa galaysa.

Xabsiga boqolaal qof ayaa waxa lagu xereeyay qol kaliya. Meel la seexadana ma laha oo dadku way isku dul tuulanyihiin rag iyo dumarba. Nalama siin wax cunno ah. Waxa nala siinayaa kaliya biyo kiniin hurdo ku jiro oo loogu talagalay dadku inay ku seexdaan si aanay xabsiga uga baxsan oo anay cuntana u xasuusan.

Waxa aan u malaynayaa, waxa ay Liibiyaanku sidan u samaynayaan waxa ka batay dadka ajaanibka ah.[12] Markaa ajaanibka inay garacaan, inay dilaan, inay hantidooda dhacaan, inay googooyaan, iyo in ay sun siiyaan waxba kuma aha.

Intii aanuu ku jirnay silican waxa aannu isku daynay in aan xidhiidh la samayno Safaaradda Soomaalida. Nasiib wanaag waxaa noo suurto gashay in aannu Safaaraddii la hadalno. Waxa aannu helnay mid ka mid ah shaqaalihii oo inan nagu jiray xigto yihiin. Waxa aan u sheegnay in xaaladayadu ay adag tahay waxa aanannu ka codsannay in uu noogu tago safiirka. Waxa aan u sheegnay in aannu diyaar u nahay in aan lacag siinayno safiirka oo ah 1000 dollarka maraykanka ah qofkii. Laalush ayaan ugu ballan qaadnay, maxaa yeelay waxa aan ogayn in uu qaadanayo. Safiirkii ayuu u tagay oo yidhi hadii ay bixinayaan 20,000 doolar waan fududeyn karnaa sii dayntooda.

Iyada oo qorshahaasi meel noo yaal, waxa aan bilawnay in aan

12 Waa ay adagtahay in la helo xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan tirakoobta tahriibayaasha ee Liibiya oo in badan ahayd dal ay ka sii gudbaan tabriibayaasha ka imanaya Afrikada Saharaha ka hoosaysa. Tan iyo markii la afganbiyay Kolonel Qaddaafi sannaddii 2011, amni darradii Liibiya ka jirtay waxa ay keentay in ay kordhaan tiradii tahriibayaasha iyo sidoo kale soo-galooti nacaybkuba iyada oo taa ay barbar socotay qabqabasho -xidhid, hayn iyo dib-u-celin- ay samaynayeen xoogagga ammaanku.

ehelkayagii la hadalno una sheegno in aan xabsi ku jirno aanannu lacag u baahannahay si naloo sii daayo. Ugu danbayn, 25 naga mid ah ayaa awooday inay lacagtii isku keenan. Waxa aan ku heshiinnay lacagtii halka lagu dirayo. Markii aan ku jirnay jeelka bil iyo badh ayaa nalaga soo daayay. Waxaa naga mid ahaa dad ku curyaamay intii ay xidhnaayeen iyo qaar dhul-yaal ah oo kaliya hadli karaya oo aan dhaqaaqayn.

Waxii nagu dhacay ayaa na karaarjabshay. Waa aannu niyad jabnay. Qaar naga mid ah ayaa ku dhintay badda intayadii kale oo aan anigu ku jirayna wax aannu la kulannay dhibaato intii xabsiga aan ku jirnay.

Nolol- maalmeedkii Tiriboli

Intii aan joognay Tiriboli, waxa aan ka fikirnay sidii aan magaalada ula qabsanlahayn, oo aan u fahmi lahayn xiliga ugu habboon ee badda laga gudbi karo iyo in aan ogaanno mukhalasiinta kuwa wax dira kuwa ugu wanaagsan. Waa aan is qaybinay waxa aanan degnay aqalo kala duwan. Anigu waxa aan la degay koox shan kale ah..

Maalin maalmaha ka mid ah, saddex aan nahay ayaa waxa aan raacnay bas tagayay meel u dhaw safaaradda Soomaalida. Waa aannu labbisanahay, soo maydhannay cadarna isku soo buufinay. Markii aannu gaadhigii soo fuulnay oo kuraastii fadhiisanay, ayaa mid ka mid ah dadkii gaadhiga saarnaa soo kacay. Cadar meesha saarnaa oo kuwan carfisyooyinka udgoon ah ayuu soo qaaday. Saddexdayadii ayuu nagu buufiyay mijo iyo madax, isaga oo na caayaya.

Mid naga mida ah saddexdayadii ayaa waydiiyay sababta uu noo buufiyay. Ninkii ayaa si arxan darro ah leh u laagay. Qofna lama hadal ninkan mana odhan dadkan maxa aad sidaa ugu galaysaa. Ninkii wuu fadhiistay.

Mid kale oo markaa dhinac fadhiyay ayaa hadlay oo yidhi "Waxa uruya diirkiinna waayo muwaadiniin ma tahidin".

Dhacdadani saamayn badan ayay nagu yeelatay. Waxa noo muuqatay in aannaan dalkayagii joogin.

Waxaan kale oo aan xasuustaa maalin kale oo aan taksi soo raacnay. Anigu shidhka hore ayaan fadhiistay ee wadaha agtiisa. Inankii kale ee ila socdayna waxa uu fadhiistay xagga danbe. Waxa isna soo fuulay nin Liibiyaan ah oo sigaar cabaya. Wuxuu ku yidhi saaxiibkay "xageed ka timid?" Markaas ayuu saxiibkay yidhi "wax aan ka imid Soomaaliya. Ninkii ayaa yidhi "Soomaalidu waa dhibleyaal". Sigaarkii inta uu afka ka soo saaray ayuu bawdada kaga bakhtiiyey. Saaxibkay waa uu qayliyay isaga oo waydiiyay sababta uu ugubay. Wax kale maanaan samayn karayn oo aan ahayn in aan wadaha ku nidhaa jooji. Gaadhigii markaan ka dagnay ayuu dhirbaaxo labadayadiiba la dhacay. Dirawalkii ayaa isna gaadhigii ka soo dagay, oo yidhi sidee ayaad gaadhiga u joojin kartaan. Waxa aannu waydiinnay in aan bixinno lacagta taksiga. Halkii ayay lacagtii nagaga qaateen. Waxa ay nagu qaadatay maalintii oo dhan in aan gaadhno meeshi aan u soconnay.

Maalin kale, lacagtii ayaa naga go'day. Waxa ay noqotay in aannu suuqa tagno oo aan shaqo raadsano.Waxa aan tagnay goob dadku iskugu yimaaddaan, Masaarida, Soomaalida iyo dad badan oo ah jinsiyado kala duwan. Markii aan meeshii soo gaadhnay ayaa waxaa soo istaagay niman gaadhi wata. Waxay yidhaahdeen waxa aan u baahannahay saddex qof. Markiiba waa annu ku boodnay. Guri magaalada ka fog ayay na geeyeen. Wax aay na yidhaahdeen guri saddex dabaq ah ayaa halkaa hoose waxa laga qaadayaa jaajuurka dabaqa saddexaadna waa la geynayaa. Qof kastaa marka uu fuulayo saddex, afar jaajuur ah ayuu dhabarka saarayaa. Maalintiina waxa aad ku shaqaynaysaan 20 doollar.

Waxaan is lahayn nimankani waa niman wanaagsan.

Shaqadii ayaa an bilawnay. Waa aroor hore. Waa shaqadii noogu horreysay ee aan ka shaqayno Liibiya. Kor iyo hoos aayaan u noqonnay, annaga oo sidna jaajurkii. Labada lafruug baa na bakhtiyay. Nalooma oggolayn in aan joogsanno amma nasanno. Waxa aannu dhammaynay in ay 20 qof ku dhamaynayeen maalin dhan. Inkasta

oo marka aan sii fuulno matag sii daynaynay, haddana waxa aan xusuusanay in ay tani tahay sida kaliya ee aan lacag ku heli karno. Waxa aan fuulaynay dabaqa oo aan jaajurka guraynay 12 saacadood. Markii ay noo yimiddeen waxa ay noo sheegeen in aan gurno wali jaajur kale ilaa caawa. Markii aan diidnay fikraddan waxa ay nagu bilaabeen garaac. Saaxiibkay ayaa u dul qaadan kari waayay oo arrintaas diiday. Ka dib ulo ayay soo qaateen oo way garaceen.

Waxay nagu qaadatay in aan afar sacadood soconno si aannu ugu noqonno meeshii nalaga keenay. Annaga oo tabcaan ah ayaa aannu gurigii aannu daganayn gaadhnay oo la jiifsanay niyad jab.

Marka aan tacadi ka baxnaba midkale ayaa na helayay.

QAYBTA SADDEXAAD
Dhammaadkii Tahriibka

Muddo yar ka dib waxa bilaabmay celintii dadka ajaanibka ah. Hawshan lixdii bilood hal mar ayay dawladda Liibiya samayn jirtay. Soomaalidu way ku badnayd meesha, xaafado badan oo magaalada ka mid ahna way deganayd. Ciidankii ayaa bilaabay inay dadkii raafaan. Ciidanka qaybi hub ayay sitaan, qaybi budhadh biro ah, qaybna koronto dadka lagu dhajinayo. Waxa ay soo galayeen guryihii dadku ku noolaayeen, way garaacayeen oo qaadayeen iyaga oo u hanjabaya.

Waxa aan xasuustaa habeen habeennada ka mid ah oo aan daganayn guri wayn oo laba dabaq ah oo aad u balaadhan oo ay boqol qof deganaayeen. Qolkiiba waxaa seexanayay in ka badan labaataneeye qof. Dabaqa halka sare oo barxad ahayd waxaa seexan jiray dad soddon ka badan. Goor habeen ah ayaa afarta dhinac waxa naga soo istaagay Cabdibileyaal iyo ciidan. Waxa aan ku war hellay kalayaacadii. Halmar ayaa inan soo arkay dadkii qaylo dhaan kula soo dhex dhacay. Afarta dhinac ayaa loo kala yaacay.

Anigu waxa aan joogay dabaqa sare. Dadka ugu daranna waxa ay ahaayeen dadka xagga sare saarnaa oo ay noqotay in ay dabaqii xaggiisa sare ka yaacaan iskana daadiyaan Waxa aan xasuustaa wiil reer Hargaysa ahaa oo aannu saaxiibbo ahayn dabaqa xagga sare ayuu iska tuuray lug ayaanu ka jabay. Kaligii ma uu ahayn laakiin isaga si wanaagsan ayaan u xasuustaa. Cidna dan kama lahayn cid dhaawacantay iyo cid dhacday waayo dadku bilayska xidhaya ayey naftooda kala baxsanayeen.

Aniguna hoos ayaan usoo degay oo askartii ayaan isku dhiibay.

Akari ayaa iqabtay, i garaacay korantana igu qabtay. Runtii aad ayaa ay u xanuun kululayd. Waxa aan ku idhi waan ku raacayaa. Markii aan soo raacay waxa aan arkay dadkii qayb daalaa dhacaysa, qayb jajaban iyo qayb la isku ururinayo oo koronta lagu qabanayo haddii inyar laga dareemo ina ay baxsanayaan. Askarigii i waday waxa uu arkay nin kale intii uu ku mashquulsanaa ayaa aan cararay.

Waxa aan tagay guri kale oo ay gabdhuhu ku badnaayeen oo ay ku jirtay gabadh uur leh iyo gabadh kale oo xanuunsanaysa. Gurigii annaga oo joogna oo ka fakarayna halka aan ku dhuuman lahayn, ayaa haddana xaafaddii nalagu soo weeraray. Qax kale ayaa bilaabmay. Waxa ugu darnayd gabadhii uurka lahayd oo carar is tidhi dabadeedna iyada oo ordaysa bulaacad lugta la gashay, dabadeedna uurka dhulka ku dhufatay. Gabadhii dhiig ayaa ka yimid wax kaalma ahna ma helin. Waxa aan maqlayay oohinta ka baxaysa. Markii aan eegay waxa aan arkay in ay si xun u dhaawacantay. Waa an iska dhaafay waayo waxba uma aan qaban karayn. Waxa an is idhi ciidankan ayaa qaadaya meel ay geeyaanba. Gabadh kale oo iyaduna meesha joogtay way suuxday markii ay cabbaar oroday. Waxa la ii sheegay in ay naxday oo xanuunsatay sidaas darteed inyarba aanay ordin.

Runtii dadka waxa ka muuqday niyadjab. Dumarka ayaa ugu darnaa waayo raggu way ordi karayeen inkasta oo iyaga aad loo doondoonayay waayo waxaa la is leeyahay waxwalba ragga ayaa ka danbeeya. Dumarku waxa ay u ordayeen baqdin ay ka qabaan in la xidho ama la musaafuriyo. Ragga haddii la qabto, si xun ayaa loo jidhdilayay amaba naftaa laga jarayay. Inkasta oo dumarku cabsanayeen, haddana looma jidhdilayn sida ragga oo kale.

Kadib markii aan muddo aan ordaynay ayaan haddana guri kale oo magaalada kuyaal tagnay. Xaafadda waxa aannu ugu tagay qolyo farabadan oo budhcad badeed oo lacag badan haysta oo deggan guri. Budhcad badeeddani waxa ay ahaayeen Soomaali oo maraakiib lacag badan kasoo qaatay oo koox iskula socota. Lacagtu waxa ay uga daadanaysaa sida qashinka. Mid ka mid ah budhcad

badeedda waxay ay qaraabo ahaayeen wiil aannu saaxiibbo ahayn isaga ayaana nimankii ii geeyay. Nimankaasi lacagta ay haystaan iyo guriga ay kiraysteen ma malaynaysid.

Halkaa muddo gaaban ayaan joogay.Waxa iga go'ay markaa sahaydii. Ilaa hadda xaafadayada mar iyo laba jeer oo aan wax waydiiyay way ii soo direen oo ah markii aan jeelka ku jiray iyo markale sidaa awgeed markan way adkaatay in aan cid danbe lacag waydiiyo.

Xoogsigii Tiriboli

Hadda waxa ay noqotay in aan bal maskaxda aan ka shaqaysiiyo si aan wax u heli karo waayo cid wax i taraysaa ma jirin. Wax aan xasuustay maalmahii aan sugaynay doonta ayaa waxaa naloo keenay jaakado yaryar oo kuwa badda oo afar ah. Ka dib waxa aan ku fikiray in haddii aan dadkan tahriibayaasha aan ka iibsho aan lacag ka faa'iidi karo. Waxa aan raadshay jaakadahii oo koontarabaan ah maxaa yeelay bilayska ayaa isha ku haya kala iibsiga jaakadaha badda oo si qarsoodi ah loo iibsho.

Maaddaama aanan lacag haysan waxa aan ka fikiray sidii aan lacag an baahiyahayga ku daboolo u heli laha. Safaaradda Soomaalida ayaan imidday. Waxa aanan kula kulmay nimankii na xerayn jiray ee doontii hore raray wiil kamid ah. Waxa aan waydiiyay jaakadahaa badda sida lagu heli karo. Waxa uu ii sheegay in suuqa lagu iibiyo. Wuu ogaa meesha lagu iibsho, maxaa yeelay saxiibkii ayaa tahriibiyaasha u soo iibin jiray, Waxa aan u sheegay in aan aad ugu baahanahay.

Markii aan meeshii tagnay mise way yaalaan iyaga oo tiro badan ah. Runtii dadku ma yaqaanaan jaakadahan. Qiimahii ayaan waydiiyaay. Waxa la ii sheegay in qiimaha halka jaakad yahay 10 dirhamka Liibiya ah oo u dhiganta 8 doolar. Waxa aan ku soo noqday nimankii budhcad badeedka ahaa iyo dadkii kale ee gurigii ku noolaa. Waxa aan ku idhi "Nimanyahow waxa aan idiin hayaa jaakadahaa badda, waxaa la rabaa qaabkii aan suuq uga samayn lahayn aniga

waxbadan iima saarna. Waa jaakaddii badda lagu mari lahaa oo aad ku badbaadi lahaydeen".

Waxa aan uga bilaabay iibka 70 doolar halkii jaakad ama 50 haddii ay tiro badan rabaan. Waxa aan idhi lacagtii qayb ii soo horumariya. Anigu waxa aan ku soo iibsaday 8 doolar halkii jaakad. Jaakadahan waa ay hawl badan yihiin waana khatar madax dhigasho ah sidaa awgeed waa in lacag laga sameeyaa amma la iska daayaa. Waxa ay ii dhiibeen lacag 1000 dollar ah oo ah 20 xabo qiimahoodii. Waxa aan ka faa'iiday 42 doolar halkii jaakadba. Aniga waxa igaga baxday lacag aan ka badnayn 200 doollar

Kadib markii aan lacagtii soo qaaday waxa aan kiraystay taksi uu lahaa nin Masri ah oo Soomaalida aad u jeclaa. Markii u horraysay ee aan isku dayo iibinta jaakadada badda waxa aan ka helay faa'iido 1000 doolar ah. Sidaa awgeed, haddana mar labaad ayaa waxa aan dirsaday 27 xabbo. Nasiib xumo bilayskii ayaa naga war helay oo na baacsaday. Jaakadahii ayaa meeshii lagu qabtay, dadkii guriga loogu yimidayna waa la garaacay oo waxa la mooday dadkii wax tahriibinayay.

Guri kale ayaa an haddana usoo wareegay oo reer Xamar daggan yihiin. Gancsigaygii halkii ayaan ka kasii waday, waayo waan ku mamay oo lacag fiican ayaa iga soo gashay. Lacagtii ayaa i soo jiidatay oo i dhiirigalisay. Dadkii gurigan waxa aan u soo bandhigay in aan ka iibsho jaakadahii. Kadib waxa aan u sheegay in aan u keenayo 10 xabbo oo tijaabo ah maadaama ay 100 xabbo u baahnaayeen. Waxa aan tegay meeshii lagu gadayay. Maan dareensanayn in bilaysku nala socday dhaqdhaqaaqayaga. Waxa laga yaabaa anaa sabab u ahaa weerarkii bilayska ee gurigii budhcad badeedda lagu soo qaaday.

Isla markii aan alaabtii taksiga saaray mise laba gaadhi oo bilays ah ayaa dhinacyadayada ordaya oo hoon ka yeedhsiinaya laydhna shidanaya. Wadahii taksiga ayaa an ka codsaday in uu xoog u socdo. Waxa na qabatay ishaaraadii iyo gawaadhi taagnayd. Waxa aan ku qasbananay in gaadhigii istaago. Markii gaadhiga socodkiisii

gaabtay, waxa aan arkay gawaadhidii bilayska oo nagu soo dhaw. Waxa aan is idhi maanta haddii lagu qabto mukhalas ayaad tahay ayaa lagu odhan maaddaama aad sidato jaakadahan. Si degdeg ah ayaan albaabkii u furay, gaadhiga iska tuuray una baxsaday.

Ka dib waxa aan tagay meeshii doonyaha laga raacayay. Doonni markaa diyaar ahayd ayaan lacagtii markiiba qadimay. Lacagtii kalena bac ayaan ku duuduubay oo suunka hoostiisa ayaan galiyay. Meel xero ah ayaa la na geeyay si degdeg ah naloo qaaday oo nala geeyay xeebtii. Waxa layaab ahayd in lacagtiina nalaga hayo doonta naloo keenayna tahay buufin dalool aan yarayn leh. Dadka qaybtood waxa ay ku adkaysteen in ay doonta daloosha fuulaan maxaa yeelay dhimasho kama ay cabsanayn oo waxa ay ka door bidayeen jeelka Liibiya. Qayb kale oo aan ka mid ahayna way diidday in ay fuulaan.

Dadkii markii ay fuuleen oo matoorkii lagu rakibayo ayaa carabkii yidhi daloolkeedu mid yar ma aha markaa doonkale ayaan idinsaarayaa dib safarka aynu u dhigno. Waxa uu ogaa in iyada oo aan gaadhin 2 km in ay istaagayso dadkuna wada dhimanayaan. Meesha laga rarayaana waa xaafaddiisii waana la ogaan doonaa in uu isagu lahaa doonta. Isagu wuu jecel yahay haddii ay ka soconayso 20km kiilomitir ama 40km oo baddaa ay galayso wixii ku dhammaanayana waxba kama galin. Markaa dadkii ayuu ku yidhi soo dega. Hasayeeshee way diideen. Ka dib iyaga oo saaran ayuu batrool ku rusheeyay doontii. Markii ay dageen oo ay ka yaaceennna dab ayuu ku qabtay waanay basbeeshay.

Waxa ay noqotay halkii in aannu ka lugayno habeenkii oo dhan oo magaaladii ku noqono.

Helliddii Shaqo Joogto ah ee Tiriboli

Magaaladii ayaa an ku soo noqday aniga oo in ka badan 1000 doolar igaga baxday doontii. Waxa aan is waydiiyay waxii aan qaban lahaa. Waan ogaa oo wali askartiina dadka way baacsanaysaa. Ka dib waxa la ii sheegay in uu jiro nin Soomaali ah oo niman Turki

ah la shaqaysta. Waxa uu yidhi shaqo waa la idiin helayaa laakiin xirfad ma leedihiin. Waxa aannu u sheegnay in waxwalba an aqoon u leenahay. Sidan waxa aan u nidhi waayo shaqo ayaan aad ugu baahayn. Waxa aan nidhi imtixaan hanalaga qaado. Ninkii bas yar ayaa uu na soo saaray waxana uu na geeyay shirkad dhisme. Shirkaddii markii nala keenay waxa la yidhi waxaa bannaan saddex fursadood oo kala ah nadiifiye u baahan xoog, waardiye habeenkii ah oo maalin oo dhan hurdaya iyo, beeroole ubaxa dhaqaaleeya.

Kii noogu xoogga badnaa waxa la siiyay shaqadii nadiifinta, kii kale waardiye ayaa laga dhigay anigana waxa la i siiyay shaqadii ubax-dhaqaalaynta. Kadib waxa la ii geeyay madaxdii shirkadda. Waxa ay i waydiyeen in aan aqaano shaqada ubaxa iyo in kale. Waxa aan u sheegay in aan xirfadda beerista leeyahay. Ma aan rabin in aan qirto aqoon la'aantayda dhanka beeraha.

Waxa la ii geeyay engineer Turki ah oo dhirtan ku takhasusay. Turkigu waa niman ad-adag. Hase ahaatee, ninkii la ii geeyay, waxa uu noqday nin wanaagsan oo dabacsan. Waxa aan ka codsaday in uu i tabo- baro saddex cisho si aan ula qabsado shaqada. Waxa an u sheegay in shaqadan muddo iigu danbaysay. Tabo-barkii saddexda cisho ahaa ayaa uu isiiyay shaqadii ayaan fahmay, ninkiina wuu tagay shaqadiina waan la wareegay. Waxa la ii xilsaaray in aan dhaqaaleeyo ubaxa waraabshana. Waxa ay ahayd shaqo fudud. Bishii u horraysay waxa aan qaatay 600 oo dollar. Markii aan shaqeeyey bil iyo badh ayaa shaqadii balaadhatay oo waxaa la keenay geedo badan oo dhul badan lagu beerayo.

Sidaa awgeed waxa la keenay markaa toban shaqaale oo Bangaaladheesh ah. Aniga iyo shaqaalahii Bangaladesh ka ahaa waa annu is fahmi waynay. Waa dad sida loo xamaalo uun garanaya. Waxaa la iiga dhigay guddoomiye. Maalintii oo dhan waxba ma qabtaan. Waxaan codsaday in la ii keeno mid afkooda iyo af-carbeedka labadaba yaqaanna. Waxa bilaabantay in aan ninkii idhaaho shaqaalahan ku dheh si fiican u shaqeeya. Tallabadan lafteedu waxba uma tarin. Marka ay i arkayaanna waa ay yara shaqeeyaan

inta aan shaqada ku mashquul sanahayna waxba ma qabtaan. Ka dib markii xaaladdu ay adkaatay, waa aan kala qaybiyay shantii qofba meel gaar ah ayaan idhi ka shaqeeya. Waxa aan u ballan qaaday in kooxda shaqo fiicnaatana la siinayo abaalmarin.

Qorshahan dartii, waxa ay bilaabeen tartan labadii kooxood shaqadiina way socotay dhulkiina wada cagaar iyo qurux ayuu noqday. Markii ay bishii labaad dhammaatay mushaharkaygii waxa la gaadhsiiyay 900 oo doolar. Shaqaalahii kale laftoodii mushaharkii waa loo kordhiyay. Shaqadaydii qof walba way soo jiidatay waana la igu jeclaaday. Waxa la igu ammaanay waxqabadkaygii. Sidoo kale ninkii soomaaligaa ahaa ee na shaqaalaysiiyay waxa lagu ammaanay in uu dad wanaagsan oo Soomaali ah soo xulay.

Shaqadii aya aan aad usii dardar galiyay, lix bilood ka dibna waxa aan helay mushahar kordhin kale. Inkasta oo aan bilkasta reerkayaga lacag u dirayay, haddana lacag fiican ayaan meel dhigtay. Maalintii danbe waxa ila soo xidhiidhay saaxibaday oo ii sheegay in qolo kale oo aan asxaab ahayn baddii ka gudbeen oo badbaadeen. Waxa ay ii sheegeen in iyaga laftooddu badda marayaan.

Kadib waxa aan u tagay maamulkii una sheegay in aan shaqada ka tagayo oo hawl dagdag ahi iisoo baxday. Runtii way ka xumaadeen waxana ay ii soo bandhigeen in ay lacagta ii kordhiyaan si ay ii joojiyaan. Kaligay ma aan ahayn saddexdayadii Soomaalida ahaydba halmar ayaan nidhi waan tagaynaa.

Waxa ay isku dayeen in ay noo caqli celiyaan naguna qanciyaan joogitaaan. Runtii waxa noo muuqatay fikirkayagii aannu kaga nimid dalkii [laba sano ka hor] in aannu ka rumayno oo Yurubtii aan doonaynay aan u gudubno. Waxa ay na waydiiyeen in aannu soo noqonayno. Waxa ku qufulnaa maskaxdayada waad gudbaysaan oo waa tagaysaan maxaa yeelay lacag fiican ayaad haysataan. Waa an ka dhaqaaqnay iyaga oo niyadjabsan.

Mar Labaad Iyo Baddii

Magaaladii ayaan soo galnay markiibana waxa aan helnay doon wayn oo qaadi karta 300 qof. Qofkiiba waxa laga qaaday 2000 oo dollar. Habeenkii markii aay ahayd 300 qof oo aan ahayn waxa la saaray doontii badda ayayna nala gashay. Kabtanka waxa lagu amray in uu na geeyo Maalta. Haddii aan Maalta u jirno wax aan ka badnayd 15 mile ayaa qolyo badan oo ka mid ah budhcad-badeeddii nala socotay oo khamri cabbayay yidhaahdeen doonta u duwa Sisiiliya. Waxay ay yidhaahdeen Malta faraha ayaa la inaga dhigayaa oo saddex sano ayaa la joogayaa. Qayb kale waxa ay ku adkaysteen in Maalta la tago. Budhcad-badeedii sakhraansanayd way ku adkaysteen in loo leexdo Sisiiliya. Si looga taxaddiro in la isku dul qabsado doonta buuxda oo aanay u hafan waxa aannu u leexanay dhankaa iyo Sisiiliya. Ka dib laba cisho iyo konton mayl doontii way shidaal beeshay waanay isa soo taagtay halmar.

Waxa ay noqotay in ay doontii iska sabbayso. Dadku hadba dhinac ayay iskugu daadanayeen. Waxaa bilaabmay oohin, wareer iyo matag. Dadku waxa ay u qaateen in ay dagayso maxaa yeelay faraha ayay ka baxday. Meeshii maalin iyo habeen markii aan saarnayn ee dhaxan iyo qabow nagu helay aya waxa naga hor yimid markab calanka Sisiiliya sita. Waxa uu noo soo turay sharaab iyo biyo.

Annaga oo cunnay oo cabnay oo is leh oo Sisiiliya ayaa la idin gayn, ayaa markab wayni yimid waxa aanu dib noogu soo jiiday Tiriboli caasimaddii Liibiya.

Waxa aan ku soo noqonnay isla jeelkii aan lacagta laaluushka ah ku bixinay si aan uga fakanno. Mar labaad waxa ay noqotay in aan u adkaysanno dhibta iyo tacadiga. Hadda laaluush lama ogolayn waayo dadka soo galootiga ah waa la tarxiilayay.

[Markii ay gaadhay in nala tarxiilo], waxa nalagu soo qaaday gawaadhi yaryar oo afartii qofba gaadhi afar askari saaranyihiin la saaray. Afartayadii waa aannu isku il-jabinnay markii gaadhigu soo yara qaboobay. Waxa jirtay markii uu gaadhigu cabbaar socday

gabadh gaadhiga oo xoog u socda iska tuurtay. Iyada oo sii qalaama -rogmanaysa ayaa noogu danbaysay. Halmar baan iska daadinay afartayadii. Nasiib darro, laba naga mid ah inta ay askartii qabteen, madaxa ka garaaceen ayaa ay gaadhigii saareen. Intayadii kale waxa aannu dhex yaacnay dhul beero ah sidaas ayaanan ku gaadhnay magaaladii.

Soo Guryo -noqoshadii

Lix bilood oo murug badan ka dib, waxa aan go'aansaday in aan dalkii ku soo noqdo. Waxa aan bilawnay socdaalkii soo guryo noqoshada. Waxa noo suuro gashay in aan helno lacag aan ku iibsanno tigidh iyo waraaqo dalku-noqosho. Dilkii iyo dhibkii Liibiya sidaas ayaan kaga soo noqonnay. Waxa aan soo marnay Dubai kana soo degnay Berbera dabayaaqadii sannadkii 2011.

Markii aannu dalka nimid ciidda ayaannu dhunkannay. Waa an seexannay oo waxa aannu dareenay farxad aan la koobi karin. Waxa aannu dareemaynay sidii dad in ta ay cadaab ku jireen jannada la geeyay. Markii aan dalka imid, Hargaysa ayaan kusoo horreeyay oo aan muddo joogay kadibna waxa aan u dhaafay Ceerigaabo oo aan aabbahay iyo reerkayagii ugu tagay. Waa la iisoo dhaweeyay qofkasta oo i arkaana wuu ku farxayay aragtidayda.

Markii aan Liibiya joogay waxaan waraysan jiray mar walba dadka naga horeeyay ee Yurub tagay. Ma aanan maqal hal qof oo nolol fiican ku nool. Waxa la ii sheegay in kaliya dadkii meesha iyaga oo yaryar la keenay, ama gaaloobay ama sifiican wax u bartay ay rajo wanaagsan leeyihiin.

Mar haddii aan soo badbaadday dalkiina aan ku soo noqday waxa aan bilaabay in aan ummada ka wacyigaliyo khatart tahriibka. Waxa aan ogaaday in ay jiraan dad badan oo u heellan in ay tahriibaan. Waxa aan ka sameeyay hawlo badan oo wacyigalin ah meelo badan aniga iyo inan saaxibkay ah. Waxa aannu ka shaqaynay wacyigalin, horumarinta waxbarashada, dayactirka dugsiyada,

iyo taakulaynta carruurta darbi-jiifka ah iyo agoomaha. Waxa aan samaystay meherad.

Waxkasta wuu ii suuro galay waayo kuma nooli dal shisheeye oo aan la iga jeclayn. Waxa aan joogaa dalkaygii, maskaxdaydu way furan tahay waxwalba oo aan hindisana waan fulin karaa. Waxa aan aad ugu faraxsanahay in noloshaydii aad isku badashay.

Run ahaantii, shaqo waan haystaa, waxbarasho wanaagsanna waan haystaa. Waxa aan la noolahay reerkayagii. Farxad waxa iigu filan marka aan habeenkii shaqada ka baxo ee aabbahay sii salaamayo. Noloshayddu hadda aad ayay u farxad badan tahay. Ilaahay ayaa aan ka baryayaa in uu sidaa iigu sii wado.

Bibliography
Ururinta Tixraaca

Ali, Nimo-ilhan. 'Going on Tahriib'. Rift Valley Forum Research Paper. London: Rift Valley Institute, 2016.

Bratner, Franziska and Mattia Toaldo. 'The Libyan context of the migration crisis'. European Council on Foreign Relations, 22 May 2015. (http://www.ecfr.eu/article/commentary_the_libyan_context_of_the_migration_crisis3040)

Gardner, Judith and Judy el Bushra. 'The Impact of War on Somali Men: An inception study'. Washington and London: LOGiCA and Rift Valley Institute, 2015. (http://www.logica-wb.org/PDFs/LOGICA_The_Impact_of_War_on_Somali_Men.pdf)

Hasan, Yusuf M. 'Somaliland: President Silanyo Appoints Committee on Illegal Immigration and Unemployment'. *Somaliland Sun*. 25 June 2013. Accessed 24 October 2015. (http://somalilandsun.com/index.php?option=com_content&view=article&id=3187:somalil and-president-silanyo-appoints-committee-illegal-immigration-and-unemployment-&catid=44:government&Itemid=647)

Sahan. 'Human Trafficking and Smuggling on the Horn of Africa–Central Mediterranean Route'. IGAD: Addis Ababa, February 2016. (http://igad.int/attachments/1284_ISSP%20Sahan%20HST%20Report%20%2018ii2016%20FINAL%20FINAL.pdf)

UNHCR. 'The Sea Route to Europe: The Mediterranean Passage in the Age of Refugees'. UNHCR: The UN Refugee Agency, July 2015. (http://www.unhcr.org/5592bd059.html)